



# Waraaqaha Gacanqabsiga Akhristaha



**WISCONSIN DEPARTMENT**  
*of* **HEALTH SERVICES**

Division of Medicaid Services

P-01704SO (08/2021)



# Waraaqaha Gacanqabsiga Akhristaha

---

## Tusmada Qoraalka

1.0	HORDHAC IYO UJEEDDO .....	1
2.0	XARFAHA LA ISKU SOO GAABIYEEY .....	2
3.0	MASULLIYAADKA IS-HAGIDDAADA .....	3
4.0	LA-SOCOSHADA MIISAANIYADDA IYO SAMEYNATA QORSHAHAYGA .....	6
5.0	KA-HORTAGIDDA MIISAANIYAD-XUMADA IYO KHIYAAMADA LACAGTA.....	10
6.0	MASLAXADDA LABADA DHINAC.....	14
7.0	SOO-SHEEGIDDA WIXII HALIS AH .....	15
8.0	HABKA XAKAMEYNATA .....	20
9.0	MACLUUMAADKA DARYEELKA CAAFIMAADKA SANNAD KASTA .....	22
10.0	SOO-BAARASHADA DANBIYO HORE .....	24
11.0	SHARCIYADA 40-KA SAAC EE CAAFIMAADKA IYO BADQABIDDA .....	26
12.0	TABABARIDDA SHAQAALAHA AAD ADIGU QORATO.....	28
13.0	OGEYSIINTA JAWAABAHA IYO CODSIGA DACWAD-DHAGEYSIGA.....	29
14.0	CABASHOYINKA LABADA NOOC.....	33
15.0	XUQUUQDAADA KAARKA MEDICAID.....	35
	WAXBARISTA GACANQABSIGA AKHRISTAHA IRIS: QEYBTA AQBALAADDA .....	37



## 1.0 HORDHAC IYO UJEEDDO

IRIS waa barnaamij ay dadku si xornimo leh naftooda ugu hagaan kuna go'aansadaan sida ay ku maareynayaan noloshooda. IRIS waxaad ku haysataa miisaaniyad aad xukunto, taasoo macnaheedu yahay inaad kala dooran karto waxyaabaha aad soo iibsaneysa, taageerada iyo adeegyada aad ku gaari karto wax kasta oo aad hiigsaneysa mustaqbalka fog. Sidoo kale waxaad xukumaysaa shaqaalaha, taasoo macnaheedu yahay inaad shaqaaleyn karto oo aad maamuleysa shaqaalahaaga si aad u gaarto hiigsiga daryeelkaaga mustaqbalka fog. Adiga ayaa nolashaada khabiir u ah balse IRIS waa habka aad miisaaniyaddaada ugu adeegsaneysa sida kuugu fiican ee hiigsiga daryeelkaaga mustaqbalka fog. Hase yeeshee xornimada iyo waxyaabaha aad kala dooraneysa waxaa kuu weheliya masuuliyadda aad qaadeysa markaad bilowdo habka is-hagidda ee IRIS.

Maskaxda ayaa lagu hayey dadka markii loo qorayey Buuggan oo ah Gacanqabsiga Akhristaha. Qeyb kasta waxaad ka hadleysaa masuuliyad gaar ah oo ku saaran markaad ku jirto IRIS iyo waxyaabo kale oo kugu caawin kara is-hagiddaada. La-taliyahaaga IRIS ayaa kaala hadli doona qeyb kasta marka ugu horreysa ee aad barnaamijka soo gasho iyo sannad kasta. Marka aad la-taliyahaaga IRIS ka wada hadashaan qeyb kasta, waa inaad saxiixdo foomka Yeelidda Waraaqaha Gacanqabsiga Akhristaha ([F-01947](#)). Xarfaha ay ka bilowdaan magaca aabbahaa iyo awoowahaa, iyo saxiixaaga foomka oggolaanshaha ayey isticmaaleysaa Waaxda Adeegyada Caafimaadka (Department of Health Services) si loo hubsado inaad la-taliyahaaga isla eegteen qoraalka oo dhan.

**HAYSO Gacanqabsigan** si aad uga eegato wixii su'aalo ah oo aad qabto. Haddii aad wax fahmi weydo ama aad su'aalo ka qabto wax uusan Gacanqabsigan kaaga jawaabeyn, weydii la-taliyahaaga IRIS ama xafiiska miisaaniyadda iyo shaqaaleynta. Caawimaad ayaad ka heleysaa labadaas dhinac.

### MACLUUMAADKA XAFIISYADA MUHIIMKA KUU AH

#### Xafiiska La-taliyaha IRIS:

Magaca: \_\_\_\_\_ Lambarka Taleefanka: \_\_\_\_\_

#### La-taliyaha IRIS:

Magaca: \_\_\_\_\_ Lambarka Taleefanka: \_\_\_\_\_

#### Wakiilka Miisaaniyadda iyo Shaqaaleynta:

Magaca: \_\_\_\_\_ Lambarka Taleefanka: \_\_\_\_\_



## 2.0 XARFAHA LA ISKU SOO GAABIYEEY

IRIS waa xarfo la isku soo gaabiyey oo u taagan Include, Respect, I Self-Direct. Xarfaha la isku soo gaabiyey waa marka eray laga sameeyo xarfaha ugu horreeya ee magac ama kelmado. Xarfo la soo gaabiyey waxaad marar badan ka maqli doontaa markaad la hadleyso wakiilka miisaaniyadda iyo shaqaaleynta ama la-taliyaha IRIS, oo weliba waxaad ku arkeysaa foomamka qaarkood iyo waraaqaha. Jaantuska hoose waxaa ku qoran xarfaha la soo gaabiyey kuwooda caamka ee barnaamijka IRIS. La-taliyahaaga IRIS weydii haddii aad maqasho ama aragto xarfo aadan aqoon macnahooda.

ADRC	Xarunta Tasiilaadka Waayeelka iyo Naafannimada
AFH	Hoyga qoysaska dadka waaweyn
ALJ	Garsoore dacwad madani ah
APS	Adeegyada ilaalinta dadka waaweyn
BA	Miisaaniyadda oo wax laga beddelo
BOALTC	Guddiga Wisconsin ee Daryeelka Waayeelka Mustaqbalka Fog
BSP	Qorshaha taageeridda habdhaqanka
BUP	Qorshe labaad
CIC	Is-beddel xaaladeed
CIR	Warbixinta waxyaabaha muhiimka ah
DHA	Qeybta Dhageysiga Dacwadaha iyo Racfaanka
DHS	Waaxda Adeegyada Caafimaadka
DRW	Disability Rights Wisconsin (Ururka Xuquuqda Naafada Wisconsin)
EVV	Xaqiijinta booqasho kulan la'aan ah
FEA	Wakiilka miisaaniyadda iyo shaqaaleynta
HCBS	Adeegyada guriga iyo bulshada dhexdeeda
IC	La-taliyaha IRIS
ICA	Xafiiska la-taliyaha IRIS
ILC	Xarun lagu noolaado iyadoon lagu caawineyn
IMD	Isbitaalka xanuunnada dhimirka
ISSP	Qorshaha adeegga iyo taageeridda shakhsiga ah
LTC FS	Baarista Daryeelka Waxqabsiga Mustaqbalka-Fog
MAPC	Xafiiska daryeelka shakhsiga ee Medicaid
NOA	Ogeysiiska go'aan
OTE	Kharashka hal-mar
PCST	Habka baarista daryeelka shakhsiga ah
PHI	Macluumaadka xafidan ee caafimaadka
PHW	Shaqaale uu qof qortay
RCAC	Guryaha wadaagga ah ee daryeelka dadweynaha
RM	Habka xakameynta
RN	Kalkaaliso Sare
SDPC	Daryeelka shakhsiga ah ee aad sameysato
SOD	Dhibaataada qoran

### 3.0 MASULLIYAADKA IS-HAGIDDAADA

Markaad IRIS isticmaaleyso, adigaa xukuma oo haga daryeelkaaga mustaqbalka fog. Taas macnaheedu waa in aad wax kasta go'aamiso. Adigaa khabiir ku ah noloshaada. Adigaa si fiican u yaqaan wixii muhiim kuu ah iyo taageerada aad u baahan tahay. Barnaamijka IRIS wuxuu kugu caawinayaa inaad wixii aad hiigsaneyso mustaqbalka fog si aad noloshaada ugu wadato sidii aad rabto.

Barnaamijka IRIS inaad ku jirto macnaheedu ma aha in aad wax kasta adigu sameysaneyso—waxaad u baahan tahay dad kale oo danahaaga kugu caawiya. Xafiiska la-taliyahaaga ee IRIS iyo wakiilka miisaaniyadda iyo shaqaaleynta ayaa ku caawinaya haddii aad su'aalo qabto ama aad fahmi weydo masuuliyadkaaga.

Inaad adigu is-xukunto macnaheedu waa inaad u baahan tahay raacidda habka iyo sharciyada barnaamijka IRIS. Waxaa muhiim ah inaad fahamto masuuliyadkaaga markaad go'aan gaareyso iyo inaad miisaaniyaddaada isticmaasho.

Barnaamijka IRIS go'aankiisa adigaa leh, balse waa inaad dadka kula shaqeeya la wadaagto wixii muhiim kuu ah. Sidaas awgeed waxaad masuul ka tahay:

- Inaad go'aansato meeshaad rabto inaad ku noolaato. Haddii aad rabto inaad ku noolaato guryaha lagu hayo dadka xanuunsan ama guryaha naafada, barnaamijka IRIS kuma jiri kartid. Laakiin haddii aad rabto inaad ku dhex noolaato gurigaaga oo ku dhex yaalla xaafadaha dadweynaha, guryo ay dadka waaweyn kireystaan, ama guryo dabaqyo ah oo aad dad kale wada deggen tihiin, barnaamijka IRIS waa ku jiri kartaa.
- Waa inaad doorato xafiiska la-taliyada IRIS iyo la-taliyaha IRIS ee aad rabto in ay kula shaqeeyaan.
- Waa inaad doorato wakiilka miisaaniyadda iyo shaqaaleynta ee aad rabto in uu kula shaqeeyo.
- La-taliyahaaga IRIS u sheeg haddii aad iska beddesho lambarka taleefankaaga ama cinwaanka guriga.
- La-taliyahaaga IRIS koobbi ka sii waraaqda qofka sharci ahaan go'aankaaga qeyb ka noqon kara.
- Sannad kasta nagu caawi qorista daryeelkaaga waxqabsiga ee mustaqbalka fog.
- La-taliyahaaga IRIS u sheeg haddii ay wax iska beddelaan xaaladdaada ama baahidaada.
- Iska hubso inaad saxiixdo waraaqaha muhiimka ah, sida qorshahaaga, oo koobbi ka sii la-taliyahaaga IRIS.
- Adigu naftaada waa inaad gaarto go'aammadaada sharciga ah ama ka dhigo qof masuul kaa noqda oo imaan kara ama taleefan lagu heli karo, ugu yaraan bishiiba mar, ama haddii loo baahdo marar badan, si markaas la-taliyahaaga IRIS uu idiin la socon karo oo idiinku caawiyo barnaamijka is-hagidda.
- Adigu la soco in ay la-taliyahaaga IRIS iyo wakiilka miisaaniyadda iyo shaqaaleynta kugu caawinayaan wixii aad u baahan tahay. Haddii aadan ku qanacsaneyn la-taliyahaaga IRIS, xafiiska la-taliyaha ee IRIS, ama wakiilka miisaaniyadda iyo shaqaaleynta, waxaad xaq u leedahay inaad iska beddesho.
- Ixtiraam u muuji shaqaalaha, xafiiska shaqaalaha, kalkaalisada daryeelka shakhsiga ah ee is-hagiddaada, la-taliyahaaga IRIS, xafiiska la-taliyaha IRIS, iyo wakiilka miisaaniyadda iyo shaqaaleynta, oo kulanka gurigaaga hoosta ha gelin ee xoogaa ka fogow.

Marka aad eegto taageeradaada shakhsi ahaaneed iyo qorshahaaga adeegga, masuuliyadda kaa saaran waa:

- Inaad noloshaada ka hadasho, sababtoo ah qorshahaagu waa baahidaada oo dhan, sida wax laguugu qabanaayo, iyo waxyaabaha ama adeegyada aad u baahan tahay.
- Inaad sameysato yoolalka mustaqbalka fog ee naftaada, adigoo baahidaada ku saleynaya, si waxyaabaha iyo adeegyada aad uga baahan tahay barnaamijka IRIS aad yoolalkaaga ugu gaarto.
- Inaad kala doorato waxyaabahaad u baahan tahay, taageerada, iyo adeegyada qorshahaaga.
- Inaad shaqaalaha u sheegto taageerada aad u baahan tahay iyo inaad la socodsiiiso marka qorshahaagu is beddelo.

Inaad ahmiyad gaar ah siiso caafimaadkaaga iyo badqabiddaada, taasoo ah masuuliyaddaada:

- Inaad kala shaqeyso la-taliyahaaga IRIS inaad badqabto iyo inaad caafimaad qabto.
- Inaad haysato qorshe labaad oo ah xaaladaha degdegga ah haddii shaqaalaha ama xafiiskooda aad ka war heli weydo.
- Inaad la-taliyahaaga IRIS u soo sheegto wixii arrimo khatar ah sida ugu dhakhso badan marka aad badqabto oo aad la soo xiriiri karto.
- Inaad la-taliyahaaga IRIS sida ugu dhakhso badan taleefan ugu soo dirto markaad gasho isbitaal, guryaha baxnaaninta ee noloshaada lagugu caawinayo, guryaha dadka xanuunsan, xabsi ama meel kale.
- Inaad la-taliyahaaga IRIS u soo sheegto haddii aad dhib ku qabto mid ka mid ah shaqaalaha kuu adeega, ama ay si khalad u qortaan saacadaha shaqada, ama marka wax lagaa xado, ama aysan ka soo baxayn waajibaadkooda shaqada.

Waajibaad dhaqaale ayaa kaa saaran barnaamijka IRIS. Waxaa masuuliyad kaa saaran tahay:

- Inaad adigu bixiso kharashka jeebkaaga laga rabo kowda bil kasta. Xafiiska dakhligaaga la socda ayaa kuu sheegi doona haddii aad u baahan tahay inaad bixiso kharash jeebkaaga ah si aad ugu jirto Medicaid iyo barnaamijka IRIS.
- Inaad isticmaasho adeegyada kaarka Medicaid ForwardHealth ka hor intaadan isticmaalin lacagtaada IRIS si loogu bixiyo adeegyada qorshahaaga.
- Inaad shaqaalaha u sheegto in aysan lacag ku soo dallacan karin markaad gasho isbitaal, guryaha baxnaaninta ee noloshaada lagugu caawinayo, guryaha dadka xanuunsan, xabsi ama meel kale.

Markaad ku jirto barnaamijka IRIS, adiga ayey masuuliyad kaa saaran tahay inaad shaqaale qoroto:

- Inaad doorato dadka kuu shaqeynaya soo hesho, wareysi la yeelato, oo dabadeedna shaqaale ka dhigato; iyo inaad doorato xafiis la socda daryeelkaaga; ama labadaba.
- Inaad maamusho oo aad tababar siiso shaqaalaha aad qorato.
- Inaad hubiso shaqaalaha aad qorato in ay kuu caawiyaan sida aad ugu baahan tahay.
- Inaad la xiriirto wakiilka miisaaniyadda iyo shaqaaleynta haddii shaqaalahaaga ama xafiiska ay dhib ku qabaan saacadahooda ama helidda lacagahooda.



Haddii aad go'aansato in aad shaqaale keensato oo aysan xafiisku kuu keenin, waxaa masuuliyad kaa saaran tahay:

- Inaad kala shaqeyso la-taliyahaaga IRIS si aad u fahamto arrimaha shaqaalahaaga iyo si aad u hubiso in aad ku filan tahay shaqaaleynta, tababaridda, jadwal-sameynta, maamulidda, iyo sida aad shaqada uga eryi karto.
- Inaad hubiso shaqaalaha in la oggolaado oo la soo baarto shakhsiyaddooda ka hor intaysan wax shaqo ah kuu bilaabin.
- Inaad sameyso jadwalka ay shaqaaluhu kuugu shaqeynayaan iyo inaad maamusho saacadaha shaqada si aadan u isticmaalin saacado ama lacag ka badan inta qorshahaaga kuugu qoran.
- Inaad la-taliyahaaga IRIS iyo wakiilka miisaaniyadda iyo shaqaaleynta u sheegto markaad shaqaale iska erido ama aad qof cusub qoraneyso.
- Inaad hubiso saacadaha shaqaalahaagu in ay sax yihiin oo loo gudbiyo wakiilka miisaaniyadda iyo shaqaaleynta. Waxaad maalmaha waraaqaha la gudbiyo iyo mushaarka ka eegi kartaa jadwalka mushaar-bixinta ee wakiilka miisaaniyadda iyo shaqaaleynta.

## 4.0 LA-SOCOSHADA MIISAANIYADDA IYO SAMEYNTA QORSHAHAYGA

Adiga ayaa go'aaminaya sidaad u isticmaaleyso miisaaniyadda IRIS iyo baahida daryeelkaaga mustaqbalka fog. Miisaaniyaddaadu waa waxa aad adiga iyo la-taliyahaaga IRIS u isticmaaleysaan qorshaha taageerada iyo adeegga. Waxaa muhiim ah inaad fahamto sida lagu go'aamiyo miisaaniyadda iyo sida aad ugu isticmaaleyso yoolalka aad gaareyso. Waxa kale oo aad u baahan tahay inaad hubiso inaad miisaaniyadda u isticmaasho sida ugu habboon.

### Sidee loo Go'aamiyaa Miisaaniyadda?

Sannad kasta xafiiska la-taliyahaaga IRIS ayaa kuu qoraya qorshaha daryeelka mustaqbalka fog. Qorshaha waxaa lagu hubinayaa inaad weli xaq u leedahay barnaamijka IRIS. Macluumaadka qorshahaaga ayaa dabadeedna la dhex geliyaa qaaciddo xisaab ah. Qaaciddadaas waa kharashkii hore ee adeegga oo waxaa lagu soo saaraa qiyaasta miisaaniyadda. Qiyaasta miisaaniyadda waa AY yaraan kartaa ama badan kartaa, xataa haddii daryeelkaaga mustaqbalka fog uu isku mid yahay. Miisaaniyadda waxaa loo isticmaalaa in lagu sameeyo Taageeradaada Shakhsiga ah iyo Qorshahaaga Adeegga.

### Sidee Baan Miisaaniyadda ugu Isticmaalayaa Taageerada Shakhsiga ah iyo Qorshaha Adeegga?

Taageeradaada shakhsiga ah iyo qorshahaaga adeegga ayey ka muuqataa sidaad miisaaniyadda ugu isticmaasho yoolalkaaga mustaqbalka fog. La-taliyahaaga IRIS ayaa kula shaqeynaya markaad qorshe sameysaneyso. Qorshahaagu waa yoolalkaaga daryeelka mustaqbalka dheer, shaqaalahaaga, taageeradaada, adeegyadaada, iyo yoolalka aad u baahan tahay.

### Muxuu yahay Yoolka Mustaqbalka Fog?

Daryeelka mutaqbalka fog waa waxa aad rabto inaad ku gaarto taageerada, adeegyada iyo waxyaabaha kale ee lagu qabto. Yoolalkaaga waa in lagu xaqiijiyo inaad noloshada u wadato sidii aad rabto iyo inaad bulshada ka mid tahay oo wixii aad rabto ku dhex hesho. Yoolalkaaga waxaa lacagtooda bixiya meelo badan, ee ma aha barnaamijka IRIS oo keliya. Markaad ogaato yoolalkaaga, la-taliyahaaga IRIS ayaa kaala shaqeyn doona helidda xeeladaha aad ku gaari karto.

#### Tusaale:

Yoolkaaga: Waxaan rabaa inaan hagaajiyo caafimaadkeyga.

Xeeladaha: Waxaan joojinayaa sigaarka oo daawada Chantix ayaan rabaa (kaarka Medicaid). Waxaan rabaa inaan jimicsi badan ku sameeyo meel xaafadda ku dhex taalla (IRIS). Waxaan cunayaa cunto nafaqo leh anigoo raacaya qorshe iyo liis cunto aan soo iibsado (uma baahnid taageero ama adeeg).

Ka hor intaadan qeyb ka isticmaalin miisaaniyadda IRIS, waa inaad waxyaabahaas raadsato marka hore:

- Taageerada caadiga ah ee aan lagaa bixineyn, sida in uu saaxiib ama qoysku kugu caawiyaan in ay kaa bixiyaan.
- Adeegyada kaarka Medicaid.



- Taageerada kale ee aad dadka ka heleyso, sida Qeybta Tababarka Baxnaaninta ah.

Markaad ogaato yoolalkaaga iyo sida lagu helo, adiga iyo la-taliyahaaga IRIS ayaa ogaanaya taageerada aad u baahan tahay iyo meeshaad ka heleyso. Dabadeedna waxaad ogaaneysaa sicirkooda iyo sida aad wax ama adeeg ugu baahan tahay. Waxaad garan doontaa shaqaalaha aad rabto adiga oo weydiinaya lacagta ay rabaan in hawsha lagu qabanaayo. Waxaa muhiim ah in lacagta aad u go'aamiso ay tahay mid macquul ah, sida badan, isla markaasna caadi ah. Taas macnaheedu waa in lacagta shaqaalaha helayo ay la mid tahay midda ay qaataan shaqaalaha kale ee la midka ah ee ay isku shaqada yihiin ee xaafaddaada. Adiga ayaa masuul ka ah inaad hubiso in adeegyada qorshahaagu yihiin kuwa ugu raqiisan.

Marka aad adiga iyo la-taliyahaaga IRIS qortaan macluumaadka, taageeradaada shakhsiga ah iyo qorshahaaga adeegga ayaa la sameyn doonaa. Waxaa muhiim ah inaad fahamsan tahay waxyaabaha ku qoran qorshaha, oo waxaa ka mid ah:

- Adeegyada aad u baahan tahay
- Shaqaalaha aad ka heli doonto adeegayda iyo taageerada
- Lacagta loo oggol yahay adeegyada iyo taageerada
- Tirada saacadaha horay loogu soo oggolaaday adeegyadaas.

Haddii ay u baahidaada ama xaaladdaadu is beddesho, isla markiiba hubso inaad u sheegto la-taliyahaaga IRIS. La-taliyahaaga IRIS ayaa habsan doona in qorshahaaga la cusbooneysiyo.

## **Sidee Shaqaalaha ugala Heshiyaa Lacagta Shaqada?**

Shaqaalahaaga ayaa masuul ka ah in ay kuu sheegtaan wax macquul ah. Lacagta waa in lagu saleeyo baahidaada oo kharashkoodu waa in uu la mid noqdo shaqaalaha kale ee deegaankaaga. Waxaad xaq u leedahay inaad la xiriirto shaqaale kala duwan si aad u ogaato lacagta ay isla adeeggaas kuugu sameynayaan. Markaad isu barbar-dhigeysa lacagaha, iska hubso inaad isu barbar-dhigto adeegoodu inuu isku mid yahay.

Waxaad xaq u leedahay in aad shaqaalaha weydiiso faahfaahin sida ay ku go'aamiyaan lacagta ay kuugu shaqeynayaan. Sidaas ayaad ku fahmi kartaa waxyaabaha iyo adeegyada aad ka filan karto shaqada ay kuu qaban doonaan. Waxa kale oo ay arrintan kugu caawineysaa sababta ay u kala badan tahay ama u kala yar tahay lacagaha ay kuu sheegtaan. Waxaad weydiin kartaa la-taliyahaaga IRIS haddii aad u maleyneyso in aysan lacagtoodu macquul ahayn. Waxaad xaq u leedahay inaad kala heshiiso lacagta shaqaalahaaga markii aad rabto.

## **Ka Warran haddii aan u baahdo Lacag ka badan tan ku qoran Miisaaniyaddeyda?**

Waxaad soo codsan kartaa lacag dheeraad ah oo aad ku bixiso taageerada aad u baahan tahay. Sida lagu helo waa iyadoo wax laga beddelo miisaaniyadda ama codsi lacag hal mar ah. Haddii aad u maleyneyso inaad lacag badan u baahneyso kala hadal la-taliyahaaga IRIS si laguugu sheego waxyaabaha aad heli karto. Waxa kale oo laguugu sheegayaa sidaad codsi u dirsan karto si kharash hal mar ah awgiis wax looga beddelo miisaaniyadda. Laakiin adigaa masuul ka ah inaad la-taliyahaaga IRIS ku caawiso soo-helidda macluumaadka codsiyada. Waaxda Adeegyada Caafimaadka (The Department of Health Services) waxay masuul ka tahay eegista codsiyada oo dhan iyo in ay go'aan ka soo gaarto.

## Sidee Baan Miisaaniyaddeyda Ugu Isticmaalaa Si Masuuliyad Leh?

Adiga iyo la-taliyahaaga IRIS ayaa sameynaya oggolaanshaha adeegga taageerada shakhsiga ah ee qorshaha adeegga. Oggolaanshaha adeegyada ayaa dhigaya nooca adeegga, saacadaha, lacagta, shaqaalaha, iyo wakhtiga la oggolaaday.

- Adigu waxaad masuul ka tahay inaad shaqaalaha u sheegto adeegyada iyo taageerada lagu soo oggolaaday.
- Adigu waxaad masuul ka tahay inaad miisaaniyaddaada IRIS u isticmaasho taageerada iyo adeegyada aad u baahan tahay.
- Shaqaalaha ha ugu yeeran in ay kuu shaqeeyaan wax ka badan inta lagu oggol yahay.
- Adigu waa inaad saxiixin waraaqaha saacadaha ee adeegyo aan lagu qaban.
- Ha saxiixin waraaqda shaqaalaha haddii ay saacaduhu ka badan yihiin inta shaqada loo oggol yahay.

Waaxda Adeegyada Caafimaadka, xafiiska la-taliyahaaga IRIS, iyo wakiilka miisaaniyadda iyo shaqaaleynta waxaad ka wada shaqeyneysaan in aad la socotaan isticmaalidda kharashka iyo inaad ogaataan wixii kharash dheeraad ah, kharashka soo hara, iyo khiyaamo in aysan dhicin. Waaxda Adeegyada Caafimaadka si adag ayey ula soconeysaa wax kasta oo ah kharash dheeraad ah iyo kharashka aan la isticmaalin, marka waa inaad fahamto si miisaaniyadda loogu isticmaalo si sax ah. Haddii aad si sax u maamuli weydo miisaaniyaddaada, barnaamijka ayaa lagaa saari karaa.

- Haddii aad isticmaasho kharash dheeraad ah oo aan qorshahaaga lagu oggolaan, waa inaad kharashka dambe yareyso si aad isugu filneysiiso. La-taliyahaaga IRIS ayaa kugu caawin kara inaad qorshe sameysato.
- Haddii aad waxba ka isticmaali weydo miisaaniyaddaada IRIS, waxay u muuqataa inaad u baahneyn adeegyada IRIS. Waa inaad go'aansato haddii aad qabto baahi aad ku bixiso miisaaniyaddaada. La-taliyahaaga IRIS kala shaqee inaad ogaato sababta aad u isticmaali weyday miisaaniyaddaada.
- Iska hubso waraaqaha shaqaalaha ee aad saxiixayso ama ay shaqaaluhu soo gudbinayaan in aysan ka badneyn miisaaniyaddaada oo qorshahaaga intuu oggol yahay ha dhaafin.

## 5.0 KA-HORTAGIDDA MIISAANIYAD-XUMADA IYO KHIYAAMADA LACAGTA

IRIS waxaa muhiim u ah inaad masuul ka tahay maamulidda miisaaniyadda, inaad ka hortagto khiyaamada lacagta iyo inaad khasaarin lacagta Medicaid.

Dadweynaha, masuulkooda, iyo shaqaalaha muhiim ayey u tahay maamulka miisaaniyadda iyo ka hortagidda khiyaamada lacagta. “Shaqaalaha” waxaa ku jira dad uu xafiis soo diro oo kuu shaqeeya iyo kuwa aad adigu qorato oo la yiraahdo shaqaalaha dadku qorto. Haddii uu jiro qof masuul kaa ah ama masuul kuu sharciyeysan, qofkaas ayaa hubinaya in miisaaniyadda si sax ah loo maamulay loona bixiyey.

Haddii aad u maleyneyso in uu qof shaqaale ah sameeyey khiyaamo lacageed, waa khasab inaad u soo sheegto sida ugu dhakhso badan ee aad u ogaato. Waxaad u soo sheegi kartaa siyaabaha hoos ku qoran:

- Inaad ogeysiiso la-taliyahaaga IRIS.
- Inaad ogeysiiso wakiilka miisaaniyadda iyo shaqaaleynta.
- Inaad ogeysiiso barta internetka ee xafiiska baarista guud iyo qabashada khiyaamada lacagta ee waaxda adeegyada caafimaadka (Department of Health Services Office of the Inspector General) <https://www.dhs.wisconsin.gov/fraud> ama soo garaac: 1-877-865-3432.

Si aad uga hortagto khiyaamada lacageed oo aad miisaaniyaddaada si sax ah ugu maamusho, waa inaad barato wax ay yihiin miisaaniyad-xumada iyo khiyaamada. Hoos ka akhriso tusaaleyaal ah miisaaniyad-xumada iyo khiyaamada lacageed. Wax kasta oo dhici kara halkan kuma qorna, laakiin fikrad fiican ayaad ka heleysaa.

- **Haddii qof shaqaale ah uu soo dallacdo lacag ka badan saacadihii uu shaqeeyey, taasi waa khiyaamo lacageed.**

Tusaale: Shaqaale ayaa 20 saacadood kuu shaqeeyey, laakiin waraaqda saacadaha waxaa ugu qoran 40 saac.

- Shaqaalaha waxa ay soo dallacan karaan saacadaha saxda ah ee ay sameeyeen daryeelkaaga sida loo oggol yahay ee ku qoran Taageerada Shakhsiga ah iyo Qorshaha Adeegga.
- Waa khasab in aad hubiso in aysan shaqaaluhu soo dallacan wakhti aysan shaqeyn.
- Haddii aad saxiixdo waraaqda saacadaha oo uu qof shaqaale ah ku qaato saacado aysan shaqeyn, adigaa miisaaniyad-xumo sameeyey oo khiyaamada qeyb ka ah. Waxaa laguu soo gudbin karaa xafiiska baarista guud iyo qabashada khiyaamada lacagta, iyo Waaxda Garsoorka oo maxkamad kula tageysa, oo waxaa lagaa saarayaa barnaamijka IRIS.

- **Haddii uu qof shaqaale ah magacaaga ku saxiixdo waraaqaha saacadaha, khiyaamo lacageed ayuu qofkaasi sameeyey.** Tusaale: Qof shaqaale ah ayaa waraaqda saacadaha ku saxiixday magacaaga isagoo qortay saacado dheeraad ah oo uusan shaqeyn.
  - Taas macnaheedu waa in aadan magaca shaqaalaha ku saxiixi karin waraaqdooda saacadaha ama in aadan sii saxiixi karin waraaq ay iyagu dib ka buuxsan doonaan. Sidaas inaad sameyso waa khiyaamo lacageed.
  - Adiga ama qofka masuulka kaa ah oo keliya ayaa saxiixi kara waraaqaha saacadaha shaqaalaha ama qaansheegadkooda.
  - Waa inaad hubsato in adiga iyo qofka masuulka kaa ah oo keliya aad tihiin dadka saxiixaya waraaqaha saacadaha ama qaansheegadka.
- **Haddii qof shaqaale ah uu beddelo tirada saacadaha ku qoran waraaq aad saxiixday adigoo yeelay, wuxuu qofkaasi sameynayo waa khiyaamo lacageed.** Tusaale: Waxaad saxiixday waraaq qof shaqaale ah oo kuu shaqeyey 10 saac oo ah hawsha taageerada ah ee guriga laguugu qabto. Waxaad qofka shaqaalaha ah weydiisatay in uu boostada kuugu soo diro waraaqdiisa saacadaha, laakiin intuuusan kuu soo dirin ayuu “10-kii” saac ku beddelay “40” saac.
  - Shaqaaluhu adiga oo aan oggolaan in ay sax tahay waxba kama beddeli karaan waraaqaha saxiixan ee la oggolaaday.
  - Markaad saxiixdo ka dib waa in aad hubiso in aan waxba laga beddelin tirada saacadaha ku qoran waraaqahooda ama qaansheegadkooda. Haddii wakiilka miisaaniyadda iyo shaqaaleynta uu helo in aadan ka war hayn in ay sax yihiin waraaqaha saacadaha shaqaalaha, waxaa lagu weydiin doonaa inaad soo gudbiso waraaqo faahfaahsan.
  - Khad cad kuma masixi kartid si aad wax u saxdo. Hal xarriijin waa inaad dul mariso khaladka, dabadeedna ha lagu ag qoro taariikhda iyo xarfaha magaca ugu horreeya ee qofka wax beddelaya. Wakiilkaaga miisaaniyadda iyo shaqaaleynta waa in uu akhrin karo wixii la beddelay.
- **Haddii aad macluumaad been ah ka sheegto qorshahaaga daryeelka mustaqbalka fog ama habka qorshahaaga daryeelka shakhsiga ah (haddii aad haysato barnaamijka Daryeelka Shakhsiga ah ee IRIS) si aad isugu deydo inaad hesho miisaaniyad badan, waxaad sameyneyso waa khiyaamo lacageed.** Tusaale: Inaad adigoo ka hadlaaya naafannimadaada iyo taageeradaada, qofka ku qiimeynaaya u sheegto in ay xaaladdaada ama daryeelkaaga shakhsiga ay aad u daran yihiin si ka badan sida saxda ah. Taasi waa khiyaamo lacageed.
  - Waa in aad sheegto macluumaad sax ah marka ay qiimeyntu kuu socoto si loo habsado in aad hesho miisaaniyad ku filan baahidaada iyo tirada saacadaha kugu habboon ee barnaamijka daryeelka shakhsiga ah ee IRIS.
  - In aad ka badbadiso naafannimadaada, baahidaada shakhsi ahaaneed, taageerada aad u baahan tahay, ama dhibaato habdhaqan ah waa isku dayid aad ku badsaneyso miisaaniyadda IRIS ama saacadaha daryeelkaaga shakhsiga ah oo waa khiyaamo lacageed oo ulakac ah. Natijadu waxay noqoneysaa in lagaa saaro barnaamijka IRIS iyo in laguugu gudbiyo baarista Waaxda Garsoorka iyo maxkamadeyn siday u badan tahay.

- **Haddii shaqaale ay soo dallacdaan adeegyo ka dib markaad dhimato ama marka aad gasho isbitaal, xabsi, guryaha dadka xanuunsan, guryaha baxnaaninta, ama meel kale oo aad ku noolaan karto, waxay sameynayaan waa khiyaamo lacageed.** Tusaale: Adigoo sinta ka jabay oo si ku meel gaar ah ugu jira guryaha baxnaaninta dadka xanuunsan. Lix usbuuc oo aad ku jirto guryaha dadka xanuunsan, shaqaale ayaa si caadi ah u soo dirsaday qaansheegadka hawsha guriga, xataa adigoo aan la kulmin.
  - Adeegyadaada waa la hakinayaa markaad gasho isbitaal, xabsi, guryaha dadka xanuunsan, guryaha baxnaaninta, ama meel kale oo aad ku noolaan karto. Sababtaas awgeed, in lacag adeeg ah la soo dallacdo wakhtigaas lama oggola.
  - Waa inaad iska hubiso in shaqaaluhu aysan waraaqo ama qaansheegad soo dirsan markaad ku jirto mid ka mid ah xaaladahaas. Waa inaad shaqaalaha oo dhan ogeysiiso markaad gasho sida meelaha: guryaha dadka xanuunsan, isbitaal, xabsi/gaalshire, guryaha baxnaaninta, ama meel kale oo aad ku noolaan karto. Waa inaad shaqaalaha xusuusiso in aysan waxba soo dallacan karin wakhtigaas.
- **Haddii ay shaqaaluhu soo dallacdaan lacagta maalintii ee hawsha guryaha mid ka badan tirada maalmaha bisha, waxay sameynayaan waa khiyaamo lacageed.** Tusaale: Gurigaaga ayaa hawlaha lagu qabto lagu soo dallacanayaa 30 maalmood hal bil, ka dibna meel aad ku nasaneysay ayaa toddoba maalmood lagu soo dallacday. Taas macnaheedu waa in lagu shaqeeyey 37 maalmood hal bil gudaheed. Shaqaalaha guryaha dadka lagu hayo iyo kuwa maalin kasta labadaba ma soo wada dallacan karaan lacag hal maalin oo isku mar ah. Tusaale ahaan, toddoba maalmood ayaa laba goor la soo dallacday iyadoo bishuna tahay 30 maalmood keliya.
  - Shaqaalaha soo dallacanaya lacag ma soo dirsan karaan wax ka badan maalmaha bisha ama marka ay adeegyo kale oo dheeraad ah la sii shaqeeyaan.
  - Waa inaad hubiso isku darka tirada maalmaha la soo dallacanayo lacagtooda maalintiiba in aysan ka badneyn maalmaha bisha oo dhan.
- **Haddii ay shaqaaluhu soo dirsadaan waraaqo badan oo ay lacagtooda ku rabaan saacado isku midkii ah, waxay sameynayaan waa khiyaamo lacageed.** Tusaale: Qof aad u shaqaaleysay hawlaha guriga inuu kugu caawiyo iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka oo ay xafiis kuu soo diraan in ay hawl caafimaad kuu qabtaan. Taas macnaheedu waa in xafiisku oggolaanayo waraaqaha shaqaalihisa, oo adiguna waxaad oggolaaneysaa waraaqaha shaqaalaha hawlaha guriga. Marka uu qofka shaqaale kuu ah ku weydiisto in aad u saxiixdo lix saac oo ah hawsha guriga, laakiin markaas ka dib ayuu qofkaasi isla lixdaas saac qaansheegad ahaan ugu dirsaday sidii kharash ah daryeel caafimaad. Qofkaasi wuxuu rabo waa in laba goor lacag lagu siiyo hal shaqo.
  - Shaqaaluhu laba xafiis oo kala duwan uma dirsan karaan shaqo daryeel ah oo ay sameeyeen hal mar.
  - Waa khasab inaad iska hubiso waraaqaha saacadaha iyo qaansheegadku in aysan noqon hal shaqaale oo dirsanaya laba shaqo lacagtood.



- **Haddii uu qof codsado in uu kuu shaqeeyo balse uu been sheego ama ku siiyo macluumaad khalad ah si aan loogu sameyn baaris shakhsiyadeed, qofkaasi wuxuu ku xadgudbayaa kharash-bixinta kaarka Medicaid oo danbiga uu galayo waa xatooyo ah nooca dadka laga galo.** Tusaale: Hebel ama Hebla ayaa lagu helay danbi weyn, kaasoo loo soo xiray kana mamnuucaya in qofkaasi u shaqeeyo hooyadiis oo ku jirta barnaamijka IRIS . Cambaro oo ay Hebel ama Hebla walaalo yihiin, iyadu wax danbi ah ma sameyn. Hebel ama Hebla ayaa dirsaday macluumaadka gabadha ay walaalaha yihiin si aan wax dambi looga soo helin. Qofkii Hebel ama Hebla ahaa wuxuu hooyadiis shaqo ugu bilaabayaa aqoonsigii Cambaro.
  - Shaqaale kasta waa in la soo hubiyo in uusan ahayn danbiile iyo in la soo baarto ka hor intaan la shaqaaleyn.
  - Waa khasab inaad oggolaan qof inuu dirsado macluumaadka qof kale si aan loo baaran loona soo helin danbiyadii uu qofkaasi horay u soo galay.

Khiyaamo kasta oo lacageed oo ah dacwad Waaxda Adeegyada Caafimaadka marna kama hareyso. Khiyaamo kasta oo lacageed waxaa loo dirayaa Waaxda Garsoorka si ay danbigaas baaris ugu sameeyaan. Khiyaamada lacagta ah ee Medicaid waxaa la isku ciqaabaa gaalshire iyo ganaax ah \$25,000 halkii mar. Waraaq kasta oo ah khiyaamo oo aad saxiixdo waxay noqoneysaa hal mar oo ah khiyaamada, marka mar kasta waa inaad iska hubiso inaad si fiican isaga fiiriso waraaqaha ka hor intaadan saxiixin. Waxaa lagaa saarayaa barnaamijka IRIS haddii lagugu helo maamul-xumo ama khiyaamo inaad ku sameysay miisaaniyaddaada. Qofkii lagu helo inuu sameeyo khiyaamo looma oggolaanayo inuu ku soo noqdo barnaamijka IRIS.

## 6.0 MASLAXADDA LABADA DHINAC

Markaad adiga iyo la-taliyahaaga IRIS sameysaan taageerada iyo qorshahaaga adeegga, waxaa jiri doona dad iyo xafiisyo lacag ku helaya in ay kuu sameeyaan taageerada, adeegga, ama waxyaabaha kale. Waxaa muhiim ah in qorshahaagu kuu hubiyo inaad ku hesho taageerada aad ku gaareyso yoolalkaaga.

### Waa maxay Maslaxadda Labada Dhinac?

Maslaxadda labada dhinac waa marka qof ama xafiis uu dhaqaale manaafacaad gaar ah ama wax la mid ah ay ugu sameeyaan taageeradaada iyo qorshaha adeegga. Taas macnaheedu waa in qofka ama xafiiska ku caawinaya ay qorshahaaga ka heleyaan shaqo, lacag, ama manaafacaad kale. Maslaxadda labada dhinac waa wax u badan in ay dhacaan marka qof ama xafiis uu dhowr xil isku hayo.

### Maxaa dhacaya haddii ay jirto Maslaxadda Labada Dhinac?

Marka xafiiska la-taliyahaaga IRIS ama wakiilka miisaaniyadda iyo shaqaaleynta uu ogaado maslaxadda labada dhinac, la-taliyahaaga IRIS:

- Ayaa kula kulmaya si aad u wada hadashaan, si aad jawaab ugu hesho su'aalahaaga, iyo si aad isula eegtaan gacanqabsiga akhristaha qeybta arrintan ka hadleysa.
- Ayaa kaa qoranaya macluumaadka xiriirkaaga dadka kuu shaqeeya, xafiisyada, shaqaalaha kale si loo hubiyo in ay jiraan wax kale oo ah maslaxad labada dhinac ah.
- Ayaa kugu caawinaya inaad xalliso arrintan maslaxadda labada dhinac.
- Ayaa kaa hubinaya in maslaxadda lagaa xalliyey.

Haddii uu la-taliyahaaga IRIS kuu sheego in ay jirto maslaxad labada dhinac ah, waxaa khasab kugu ah:

- Inaad daacad ka noqoto xiriirkaaga dadka kuu shaqeeya, xafiisyada, iyo shaqaalaha kale.
- Inaad la-taliyahaaga IRIS kala shaqeyso maslaxadda labada dhinac ee fikradaha shaqaalaha ama si xal lagu helo iyo si kale oo aad la-taliyahaaga wax ula wadaagto. Xalka waa in loo raaco habka barnaamijka IRIS.
- Samee waxa qorshahaagu dhigayo ee la-taliyahaaga IRIS kuu sameeyo si arrinta xal loogu helo.

## 7.0 SOO-SHEEGIDDA WIXII HALIS AH

Caafimaadkaaga iyo badqabkaagu waa waxa ugu muhiimsan. IRIS oo ah inaad adigu is-hageyso, la-taliyahaaga IRIS adiga ayuu kugu xiran yahay in aad u soo sheegto wixii kugu dhaca oo saameeya caafimaadka iyo badqabidda. Waxyaabahaas ayaa la yiraahdaa waxyaabaha halista ah. Adigaa masuul ka ah inaad la-taliyahaaga IRIS u soo sheegto markii ay jirto waxyaabo halis ah. Waxaa jira noocyo kala duwan oo halis ah, sida dhaawacmid, isbitaal-gelid, xanuun degdeg ah, xabsi-gelid, tacaddiyo, ama dayacaad. Wixii halis ah in sida ugu dhakhso badan uu u ogaado la-taliyahaaga IRIS waa wax aad muhiim u ah.

### Yaa soo sheegi kara Wixii Halis ah?

Adiga, masuulkaaga, wakiil kuu sharciiyeysan, xubnaha qoyskaaga, shaqaalaha, iyo dadka kale ayaa wax soo sheegi kara. Ha welwelin haddii aadan macluumaad ka haysan waxaas oo dhan ugu horreyn. Laakiin waa khasab in aad wixii halis ah soo sheegto. **Haddii aad khatar ku jirto ama aad isla markiiba caawimaad u baahan tahay, garaac 911.** Sug ilaa aad adigoo badqaba soo sheegi karto wixii jira. Haddii adiga ama qof kale oo aad garaneyso aad la kulantaan tacaddiyo ama dayacaad, la xiriir oo u sheeg xafiiska booliska deegaankaaga ama xafiiska ilaalinta dadka waaweyn ee degmadaada.

**Ha ka cabsan in aad soo sheegto wax halis kugu ah.**

**Badqabiddaada, xogdhowrida iyo ilaalinta waa waxa noogu muhiimsan.**

### Sidee baan u soo Sheegaa wax Halis ah?

Si aad u soo sheegto wax halis ah, waxaad sameyn kartaa:

- Inaad la xiriirto la-taliyahaaga IRIS.
- Inaad soo garaacdo taleefanka Xarunta IRIS Call Center oo ah: **1-888-515-4747.**

### Maxay lagaa rabaa Markaad soo Sheegeyso Wax Halis ah?

Xarunta IRIS Call Center ama la-taliyahaaga IRIS waxay ku weydiinayaan:

- Maacaaga
- Waxa dhacay
- Goorta ay wax dhaceen
- Halka ay wax ka dhaceen
- Hadda waxa dhacaya si loo hubiyo badqabiddaada iyo caafimaadkaaga
- Waxa dhici kara mustaqbalka si loo hubiyo badqabiddaada iyo caafimaadkaaga

Haddii adiga ama qofkii soo hadla aydnaan aqoon macluumaadka oo dhan, wax dhib ah ma laha. Waa inaad soo sheegto wixii halis ah iyo waxaad adigu ka ogtahay.

### Maxaa dhacaya markaan soo Seego wax Halis ah ama aniga awgay marka Qof kale wax Soo Sheego?

Marka la-taliyahaaga IRIS ay soo gaarto wax adiga halis kugu ah, waxa la sameynayo waa:

- Fahmida macluumaadka wixii dhacay.



- Hubinta caafimaadkaaga iyo badqabiddaada.
  - Qoridda warbixin loo diro Waaxda Adeegyada Caafimaadka.
- Tusaale, haddii aad kufto adigoo guriga jooga, la-taliyahaaga IRIS:
- Wuxuu ku weydiinayaa in isbitaal lagugu soo daaweeyey.
  - Wuxuu kaala hadlayaa wax aad guriga ka beddeleyso si aadan mar dambe ugu dhicin, sida in aad iska tuurto roog aad ku kufi karto.

Xafiiska la-taliyahaaga IRIS iyo Waaxda Adeegyada Caafimaadka ayaa wixii dhacay kula eegaya.

- In la hubiyo in aad caafimaad qabto iyo in aad badqabto. Haddii aad rumeysannahay in aad wax u baahan tahay, la-taliyahaaga IRIS ayaa su'aalo badan ku weydiin doona.
- Waxaa loo kuur galayaa waxa dhacay iyo sida dadka ku jira IRIS loo sugi karo badqabkooda iyo caafimaadkooda.

## **Ka Warran haddii aanan ogeyn waxa la Soo Sheego iyo haddii Wax Halis ah la Soo Sheego?**

Haddii aadan ogeyn in aad wax halis ah soo sheegto ama waxa halista ah ee dhacay, mar kasta taleefan u soo dir la-taliyahaaga IRIS ama xarunta IRIS Call Center. Waxaa lagugu caawin doonaa haddii waxa dhacay ay yihiin halis la soo sheego iyo in ay ku fahamsiiyaan nooca waxa dhacay. Dib ha u dhigan soo-sheegidda wixii halis ah.

Macluumaadka soo socda waa dhowr nooc oo ah waxyaabo halis ah oo dhici kara oo ay tahay in la soo sheego. Waxyaabaha halista ah ee ay tahay in la soo sheego waxaa ka mid ah.

<b>Nooca Waxa Dhacay</b>	<b>Faahfaahinta Waxa Dhacay</b>
Tacaddi—Dhaqaale	Taas macnaheedu waa in uu qof si khaladan u isticmaalo lacagtaada, miisaaniyaddaada, ama hanti kale. Arrintan waxay noqon kartaa danbi oo waa in loo sheego xafiiska booliska deegaankaaga.
Tacaddiyo—Maskaxeed/ Dareen ahaaneed	Taas macnaheedu waa in uu qof kuula dhaqmayo si xun. Waxa kale oo ay noqon kartaa hanjabaad dhib noqon karta, in lagu caayo, in lagu eedeeyo, in lagu inkiro, in cod cagajugleyn ah laguu adeegsado, ama hanjabaad la rabo in wax aad leedahay lagaaga qaato. Haddii uu qof dhibaato kugu hayo, si aad u baqdo, ama si aad dareen ahaan u xumaato, waxaasi waa tacaddiyo.
Tacaddiyo—Jir ahaaneed	Taas macnaheedu waa in uu qof si ulakac ah u dhaawacayo jirkaaga. Haddii uu qof jug kugu dhufto, ku dharbaaxo, ku qandhuufto, ama aad xanuun dareento marka uu si xun jirkaaga u qabto, waxaasna waa tacaddiyo.
Tacaddiyo—Galmo	Taas macnaheedu waa marka qof kugu sameeyo galmo aadan rabin ama habdhaqan la mid ah. Haddii qof ku yiraahdo daawo wax ama sawirro galmo la xiriira, oo uu kugu dhibo si uu kuu soo jiito, ama uu hoosta kaa soo galo adigoo dhibsanaya, waxaasina waa tacaddiyo.
Tacaddiyo—Hadal ah	Taas macnaheedu waa in qof kugu dhahayo ama kugu qeylinayo si aad u naxdo, u dareento hanjabaad, dhibaato, ceebeyn, ama cagajugleyn. Haddii uu qof kugu qeylinayo ama kaa cabsiinayo, waxaasina waa tacaddiyo.
Dab	Tan macnaheedu waa in uu dab qabsaday meesha aad ku nooshahay

	ama aad adeegga ka hesho. Waaxda dabdamiska waa in loogu yeero oo ay yimaadaan guriga ama dhismaha si ay wax uga qabtaan dabka.
<b>Nooca Waxa Dhacay</b>	<b>Faahfaahinta Waxa Dhacay</b>
Ciidanka Booliska— Xirid ama gudaha-dhigid	Taas macnaheedu waa in ciidanka boolisku ay si ku meel gaar ah meel ama xabsi kugu hayaan.
Ciidanka Booliska— Guddoonka Danbiyada	Taas macnaheedu waa in ciidanka boolisku u maleynayo in aad danbi gashay oo ay baarayaan wixii dhacay.
Ciidanka Booliska— Dhibbaneyaasha Danbiyada	Taas macnaheedu waa in aad tahay dhibbane danbi loo geystay, sida tacaddiyo, oo ciidanka booliska ayaa baaraya waxa dhacay.
Isticmaalka Khaldan ee Habka Xakameynta ama Qabashada	Taas macnaheedu waa in qof shaqaale ah uu si aan sax ahayn kuu xakameeyo ama kuu qabto. Waxaa tusaaleyaal ah in lagaa bixiyo qolka fadhiga, in lagu siiyo daawo aadan u baahneyn, isticmaalidda qalab aan loo baahneyn, in si kas ah lagu siiyo daawo badan, in qol laguugu xiro si ulakac ah oo aan sax ahayn.
Dayacaad—Caafimaad ahaan sida Inaan Laguu Dedaalin	Taas macnaheedu waa in qof shaqaale ah uu ku daryeeli waayey ka dib mar ay wax kugu dhaceen. Haddii qof shaqaale ah uu si dhakhso ah kuu siin waayo daryeelka aad u baahan tahay, daawo uu dhakhtar kuu qoray, ama uu dhakhtar kuu geyn waayey mar aad u baahneyd, taasi waa dayacaad. Waxa kale oo muhiim ah inaad u sheegto la-taliyahaaga IRIS haddii xaalkaagu is-beddelo sababtoo ah qorshahaaga waa in la beddelo si lagu sii caawiyo.
Dayacaad—Daawo Khaldan	Taas macnaheedu waa in uu jiray khalad ah dhinaca daawada aad qaadato, oo dababdeedna aad ku jirrato oo aad dhakhtar kula kulanto imarjensada, rug caafimaad degdeg ah, ama isbitaal.
Dayacaad—Naqfaqo	Taas macnaheedu waa in aan lagu siin cunto kugu filan oo sax ah, biyo, ama cuntooyinka kale ee caafimaadka u fiican oo aad ugu baahan tahay.
Dayacaad—Daryeel- xumo/Qorshaha oo aan La Raacin	Taas macnaheedu waa in qof shaqaale ah uu halis geliyo caafimaadkaaga iyo badqabiddaada isagoo raaci waayey qorshahaaga daryeelka, sharciyada, ama nidaamka. Haddii qof shaqaale ah kuu oggolaan waayo isticmaalka gaadiidka naafada ama uu si ulakac ah kuugu caawin waayo danahaaga, taasi waa dayacaad.
Dayacaad—Is-dayacid	Taas macnaheedu waa in aadan adigu naftaada daryeelin. Macnaheedu waa in aad khatar gelineyso jirkaaga iyo maskaxdaada sababtoo ah cuntada ma cuntid, dharka iskama beddeshid, ballamahaaga caafimaadka ma aaddid, ama dhakhtarka ilkaha ma aaddid.
Dayacaad—Shaqaale kuu Imaan Waayey	Taas macnaheedu waa in qof shaqaale ah uu kuu imaan waayo adigoo filanaayey in uu kuu qabto adeeg aad u baahan tahay. Marka shaqaaluhu imaan waayaan, adiga waxaa kaa maqan caawimaad iyo wixii kale oo aad u baahneyd oo ah badqabiddaada iyo caafimaadkaaga.

Dayacaad—Xaalado ah Badqabid La'aan ama Saxa-xumo	Taas macnaheedu waa in aad joogto guri ama meel kale oo aan nadiif ahayn, badqabid lahayn, ama in ay sababtu tahay hawada oo ka xiran dhismaha ama qolalka, ama in ay wasakheysan yihiin alaabta guriga oo aan si fiican loo nadiifin.
---	--

<b>Nooca Waxa Dhacay</b>	<b>Faahfaahinta Waxa Dhacay</b>
Iska-badinta Daawada ama Aalkolada	Taas macnaheedu waa inaad daawo laguu qoray ama daawo aan laguu qorin iska badisay, inaad si sax ah u qaadan daawadaada, inaad cabtay khamri badan, aalkolo, ama aad isticmaashay maandooriye mamnuuc ah.
Jejebinta Guri ama Hanti Kale	Taas macnaheedu waa inaad gurigaaga, guriga shaqaalaha, guri dadow, meel aad ka shaqeyso, ama meel aad adeeg ka hesho in la jejebiyo. Taas waxaa ku jirta inaad wax u jejebiso si kas ama kama ah, iyo sidoo kale inaad wax kale jejebiso oo haddii adigu aad joogtana aad khatar gelineyso badqabiddaada iyo caafimaadkaaga. Jejebinta waxa kale oo sababi kara waxyaabo dabiici ah sida duufaannada, dabeylaha daran, dabeylaha qaboobaha, ama dhulgariirka.
Isku-dayidda ah Is-dilid	Taas macnaheedu waa in aad isku dayday inaad naftaada kas isu disho.
Isbitaal-gelid aan la Filaneyn oo Degdeg ah	Taas macnaheedu waa in aad isbitaal caawimaad u raadsato sababtoo ah si kedis ama lama-filaan ayaad u xanuunsatay oo waad ka sii dari lahayd haddii aadan isbitaal isla markiiba tegin. Tusaaleyaal noocaas ah waxaa ka mid ah in isbitaal lagu seexiyo iyadoo wadnaha lagaa qabtay, aad dhacday, qabsin kugu dhacay, dab aad ku gubatay, jirkaaga uu qeyb ahaan qabow kojiyey, dhimirka lagaa baarayo, iyo naqaska oo kugu dhega.
Xanuun, Dhaawac, ama Shil Lama Filaan ah oo Daran	Taas macnaheedu waa in aad daawo degdeg ah u doonato isbitaal ama imarjenso sababtoo ah aad baad u xanuunsatay, u dhaawacantay, ama shil baad gashay. Tusaaleyaal noocaas ah waxaa ka mid ah kufid, shil gaari, murgacasho anqawga ama cumaacunta ah, ama infakshanka kaadi-mareenka. Arrintaas kuma jirto markaad isbitaal ama imarjenso degdeg u aaddo wax caadi ah oo kaarkaagu bixinaayo sida ku qoran taageerada shakhsiga ah iyo qorshahaaga adeegga.
Habdhaqan Lama Filaan ah oon ku Jirin Qorshaha Taageerada Habdhaqanka	Taas macnaheedu waa in lagugu arko habdhaqan khatar ah oo aad ku dhaawici karto naftaada ama dadka kale. Habdhaqankan waa in uu yahay mid cusub oo aan badanaa dhicin oo aysan shaqaaluhu qorsheysan, oo kuma jiro qorshaha taageerada habdhaqanka.
Gooni-u-hayn ama Dadka-saarid aan la Qorsheysan	Taas macnaheedu waa in lagu xakameeyo, lagaa fogaaday, ama dadka lagaa saaro markay jirto xaalad degdeg ah ka hor inteysan oggolaan Waaxda Adeegyada Caafimaadka.

Haddii qof barnaamijkan ku jira uu geeriyoodo, masuulka, qofka u sharciyeysan go'aankiisa, qoyska, ama saaxiib ayaa sida ugu dhakhso badan ugu soo sheegi kara xafiiska la-taliyaha IRIS.

**Ha ka cabsan in aad soo sheegto wax halis kugu ah.**

**Badqabiddaada, xogdhowrida iyo ilaalinta waa waxa ugu weyn oo noogu muhiimsan.**

## 8.0 HABKA XAKAMEYNTA

Waaxda Adeegyada Caafimaadka waxay dooneysaa inay hubiso badqabiddaada iyo caafimaadkaaga. Mararka qaarkood waxaa dhici karta in lagugu arko baahi habdhaqan ama mid caafimaad oo u baahan in lagu xakameeyo, daaweyn, ama meel in lagugu hayo si aadan ugu dhaqdhaqaaqin guriga dhexdiisa. Taas ayaa la yiraahdaa xakameyn.

Waaxda Adeegyada Caafimaadka waxay eegtaa hab kasta oo xakameyn ah oo la isticmaalo si ay u hibiso in laguula dhaqmo hab xakameyn ah oo aad ku badqabi karto. Habka xakameynta waa waxa ugu dambeeya ee la isticmaalayo **ka dib** markay soo oggolaato Waaxda Adeegyada Caafimaadka. Waaxda Adeegyada Caafimaadka waxay rumeysa tahay isticmaalidda hab fiican, hab dejin ah, iyo in dadka la ogeysiyo dhibka in ay yareyn karaan isticmaalidda habka xakameynta iyo kordhinta caafimaadka iyo badqabidda.

### Waa maxay Habka Xakameynta?

Waxaa jira laba nooc oo ah habab xakameyn ah:

- **Xakameynta caafimaadka:** Xakameynta caafimaadka waa qalab iyo hannaan xakameynaya awoodda is-dhaqaajinta ee lagu socdo iyo sameynta sidii la rabo sida marka qalliin qof lagu sameynayo. Xakameynta caafimaadka waxa kale oo loo isticmaalaa ka hor iyo ka dib marka qalliin jiro si aan dhaqdhaqaaq u imaan oo fayooobi lagu helo.
- **Xakameynta, dad-ka-saaridda, ama qalabka haynta:** Kuwaasi waa xoogaa tusaaleyaal ah:
  - Xakameynta—Aalado kala duwan, dhar, qabasho ah jirka oo aan qofku is-nuuxin karin ayaa la isticmaalaa si uusan qofku wax dhaqdhaqaaq ah u sameyn. Si sahlan loogama bixi karo xakameynta.
  - Dad-ka-saarid—Tani waa marka dadka lagaa dhex saaro (adigoon raalli ka ahayn/ama aan rabin) oo dadka lagaa fogeeyo ilaa aad is dejiso. Qalabka Difaaca ah—Tani waa qalab, sida gacmo-gelis ama koofiyad lagu xirayo oo aadan iska bixin karin. Waa wax badnaaba dadka loo xiro marka la rabo in aysan iyagu naftooda is-dhaawicin.

### Waa maxay Qorshaha Taageeridda Habdhaqanka

Qorshaha taageeridda habdhaqanka waa wax loogu tala galay shaqaalahaaga sida ay baahidaada kuugu caawinayaan ee ugu fiican. Qorsheyaasha habdhaqanka waxa kale oo ku jira hab la raaco oo ah taageerid si loo hubiyo in aad badqabto iyo si loo yareeyo dhibka adiga kaa imaanaya. Haddii la soo oggolaaday habkaaga xakameynta, waa in lagu dhex qoro qorshahaaga taageerada habdhaqanka. Qorshahaagu sidoo kale waa in uu ku jiro faahfaahinta sida iyo goorta la isticmaalayo habka xakameynta. La-taliyahaaga IRIS ayaa kaaga jawaabaya wixii su'aalo ah oo aad ka qabto qorshahaaga taageerada habdhaqanka ama habka xakameynta.

### Sidee baan u Sameystaa Qorshaha Taageerada Habdhaqanka iyo Codsiga Habka Xakameynta?

Adigaa dooran kara qofkii aad rabto inuu qeyb ka noqdo sameynta qorshaha taageerada habdhaqankaaga iyo codsiga habka xakameynta. La-taliyahaaga IRIS ayaa arrintan kaa caawin kara marka lagu sameynayo. Adiga iyo dadka aad doorato ayaa qoraya codsiga qorshaha. La-taliyahaaga IRIS ayaa kaala shaqeyn doona qoridda qorshaha taageerada habdhaqanka iyo codsiga habka xakameynta. Xafiiska la-taliyahaaga IRIS ayaa eegaya oo macluumaadkana u diri doona Waaxda Adeegyada Caafimaadka si ay u soo oggolaadaan.



## **Waaxda Adeegyada Caafimaadka Ayaa Diiday Codsiga Habkeyga Xakameyta. Taasi maxay tahay micnaheedu?**

Waaxda Adeegyada Caafimaadka waa ay diidi kartaa codsigaaga. Codsiyada waa la soo diidaa haddii habka xakameynta uusan ahayn midka ugu sahlan ee la soo qorto. Haddii codsigaaga la soo diido, waxaad kala shaqeysaa la-taliyahaaga IRIS si aad u heshaan siyaabo kale oo baahidaada u fiican. Istimaalidda hab la soo diiday waxa uu sababi karaa in lagaa saaro barnaamijka IRIS.

## **Waaxda Adeegyada Caafimaadka Waxay Oggolaatay Codsiga Habkeyga Xakameyta. Hadda Maxaa Dhacaya?**

Waaxda Adeegyada Caafimaadka waxay soo oggolaatay codsigaaga oo ah isticmaalidda hab xakameyn ah, balse ugu horreyn waa in dadka kuu shaqeeya loo tababaro sida badqabidda ah ee loo isticmaayo habka xakameynta. Habka xakameynta oo si khaldan loo isticmaalo waxay kugu keeni kartaa in aad adiga ama shaqaalaha ku dhaawacantaan. Qof kasta oo kuu shaqeeya waa in loo tababaro habka xakameynta ugu yaraan sannadkiiba hal mar. Waa in aad haysato liiska wakhtiga uu qof kasta oo kuu shaqeeya soo maray tababarka habka xakameynta.

Haddii lagu soo oggolaaday isticmaalidda hab xakameyn ah, adiga iyo dadka kuu shaqeeya waa inaad haysataan waraaqo ama buug aad ku qorataan:

- Taariikhdiisii la isticmaalay habka xakameynta,
- Tirada inta jeer ee la isticmaalay habka xakameynta,
- Faahfaahinta habka xakameynta,
- Wixii macluumaad ah, habdhaqan ama caafimaad, oo dhacay ka hor ama ka dib markii la isticmaalay habka xakameynta.
- Haddii la isticmaalay qalab xakameyn ah oo ay soo oggolaadeen qorshaha habka xakameynta, waa khasab inaad qortaan qalabkaas, goortii la kormeeray, iyo xaaladda qalabka.

Qoraalka ama buugga waa inaad la wadaagto la-taliyahaaga IRIS markaad booqasho fool-ka-fool ah ku kulataan.

## **Meeqa Jeer ayaa la Eegayaa Qorshaha Taageerada Habdhaqanka?**

Qorsheyaasha taageerada habdhaqanka waa in la eego ugu yaraan lixdii biloodba mar, ama mar kasta oo ay baahidaadu is-beddesho. Taleefan ahaan ama si toos ah, la-taliyahaaga IRIS ayaa ku khasban in uu kaala hadlo qorshaha taageerada habdhaqanka in uu kuu shaqeynayo. Qorshaha taageerada habdhaqanka haddii uusan kuu shaqeyneyn, la-taliyahaaga IRIS ayaa kugu caawinaya cusbooneysiinta qorshaha si loo sii hagaajiyo.

## **Meeqa Jeer ayaa la Eegayaa Habka Xakameynta?**

Labada dhinacba, midka caafimaadka iyo habka xakameynta ee ku qoran qorshahaaga taageerada habdhaqanka waa in la eego sannadkiiba mar. Haddii aadan u baahneyn habka xakameynta, waa inaad u sheegto la-taliyahaaga IRIS. La-taliyahaaga ayaa kugu caawin doona inaad cusbooneysiiso qorshahaaga.

## 9.0 MACLUUMAADKA DARYEELKA CAAFIMAADKA SANNAD KASTA

Mid ka mid ah sida ugu fiican ee aad ku heleyso caafimaad iyo badqabid waa inaad dhakhtar daaweynta guud ah kala xiriirto caafimaadkaaga. Waxa kale oo ku caawin karta inaad ka hortagto xanuunka oo aad aqoonsato jirrooyinka iyo infakshannada. Sababtaas awgeed ayaa sannadkiiba mar la-taliyahaaga IRIS waxa uu kaala hadli doonaa:

- Helidda dhakhtarkaaga daaweynta guud
- Sida ay muhiim u yihiin infakshanka sambabbada ama nemooniya iyo tallaalka infuluwensada
- Calaamadaha infakshannada kaadi-mareenka (UTIs).

### Helidda Dhakhtarkaaga Daaweyntaada Guud

Haddii aad ku jirto IRIS, waxaad haysataa Medicaid. Waxa kale oo aad haysan kartaa Medicare ama ceymis caafimaad oo ah barnaamij kale. Taas macnaheedu waa ceymiska caafimaadka ayaa kaa bixinaya baarista caadiga ah iyo tallaalka infuluwensada. Sidoo kale dhakhtar ayaad u tagi kartaa markaad isku aragto calaamado xanuunno ama infakshanno kale ah.

- Ma la xiriirtaa dhakhtarka daaweynta guud?
- Ma taqaan sida aad ballan uga qabsaneyso dhakhtarka daaweynta guud ee aad la xiriirto?
- Ma la kulantay dhakhtarkaaga sannadkii ugu dambeeyey?

Haddii aad “Maya” ku jawaabto mid ka mid ah su'aalahaas, la-taliyahaaga IRIS ayaa kugu caawin kara helidda dhakhtarka ama in aad ballan ka qabsato dhakhtar aad la xiriirto. Haddii aadan la kulmin dhakhtarkaaga sannadkii ugu dambeeyey, Waaxda Adeegyada Caafimaadka waxay kugu dhiirri gelineysaa inaad sameysato ballan ah baaris guud sannadka kasta si aad caafimaadkaaga ula socoto. Dhakhtarka in si caadi ah loola xiriiro ayaa looga hortagi karaa xanuunno badan oo caam ah, imarjenso in la aado, iyo isbitaal in la seexo.

Macluumaadka sida dhakhtar loo helo, fadlan ka eegto

[www.dhs.wisconsin.gov/guide/doctor.htm](http://www.dhs.wisconsin.gov/guide/doctor.htm).

### Tallaallada Infuluwsada iyo Infakshanka Sambabbada

Infuluwsada iyo infakshanka sambabbada aad baa loogu xanuunsadaa. Weliba dadka kale ayey ku sii faafi karaan. Xanuunnadaas natiijadoodu waa imarjenso in la aado, isbitaal in la seexo, iyo in ay dhimasho keenaan. Sannad kasta dhakhtarkaaga daaweynta guud ayaa ku siin kara tallaallada labadaas xanuun. Waxaad u baahan tahay in aad la xiriirto dhakhtarkaaga.

Xarunta Xakameynta iyo Ka-hortagidda Xanuunnada waxay ku taliyaan in dadka waaweyn la tallaalo sannad kasta. Waxa ay si gaar ah tallaalladu muhiim ugu yihiin dadka halista ugu jira xanuunnada in ay dhibaato kala kulmaan. Waxaa ka mid ah:

- Dadka ay da'dodu gaartay ama ka weyn tahay 65,
- Dadka ay da'doodu thay 18 ilaa 64 jir ee xanuunno qaba sida:
  - Neef
  - Sokoroow
  - Xanuunnada kelyaha ama beerka
  - Xanuun sambabka ah

- Xanuun wadnaha ah
- Dadka qaba dhibaatooyin saameeya difaaca jirka,
- Dadka dhib ku qaba aalkolada.

Xarunta Xakameynta iyo Ka-hortagidda Xanuunnada waxa kale oo ay ku talisaa tallaalka sambabka ama nemooniya in ay qaataan dadka sigaarka cabba, ku nool guryaha dadka waaweyn, ama ku nool guryaha daryeelka. Wixii faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan nemooniyada, fadlan ka eego barta internetka ee Xarunta Xakameynta iyo Ka-hortagidda Xanuunnada: <https://www.cdc.gov/vaccines/vpd-vac/pneumo/>.

## Infakshannada Kaadi-mareenka

Infakshanka kaadi-mareenka (UTI) waa caabuuq gala qeyb kasta oo ka mid ah habdhiska kaadi-mareenka—kaadi-haysta, tuubbooyinka gudaha ee kaadida, kaadi-haysta, iyo tuubbooyinka dibadda ee kaadida. Calaamadaha waxaa ka mid ah:

- Kaadi xoog badan oo joogto kuu qabaneysa
- Kuleyl gubasho ah oo la dareemo marka la kaadinayo
- Kaadida oo si joogto ah hadba in yar u fakata
- Kaadida oo midab caad ah ka muuqdo
- Kaadi oo noqota guduud, casaan khafiif ah, ama midab kale yeelata—calaamad ah dhiig in lagu dhex arko kaadida
- Kaadi ur badan
- Xanuun hoosta oo dhan ah

Haddii aad calaamadahaas isku aragto waa in aad isla markiiba la xiriirto dhakharkaaga daaweynta guud. Xanuunka caabuqa ah kaadi-baaris ayaa badanaa lagu ogaadaa. Dhakhtarku wuxuu kuu qori doonaa antabiyootig lagu daaweeyo infakshankan. Infakshannada kaadi-mareenka ee aan la iska daaweyn waxay keenaan xanuun weyn iyo kelyaha oo dhaawacma.

Infakshannada kaadi-mareenka ee aan la daaweyn waxa kale oo ay keeni karaan isbitaal in la galo, imarjenso in la aado, iyo xataa dhimashada. Waxaad xaaladahaas uga hor tagi karto waa adigoo ballan ka qabsanaya dhakhtarkaaga marka ugu horreysa ee aad calaamadaha kor ku qoran isku aragto.

## 10.0 SOO-BAARASHADA DANBIYO HORE

Mid ka mid ah hababka Waaxda Adeegga Caafimaadka waxaa lagu hubiyaa in aad badqabto iyo shaqaalaha kuu shaqeyn doona in laga soo waayo danbiyo hore. Soo-baarashada waa in macluumaad qof laga soo ururiyo haddii ay jiraan danbiyo hore ama shaqo-xumo daryeel ah. Maaddaama aad adigu shaqaalahaaga qoraneyso, waa lagu khiyaameyn karaa. Sidaas awgeed habka soo-baarashadu waa in la adkeeyo.

Shaqaaale kasta oo aad qoroto waa in laga soo waayo danbiyo hore iyo wax shaqo-xumo daryeel ah. Qofna lagama deyn karo in laga soo waayo soo-baarashada, xataa haddii kuu yahay qoys ama saaxiib.

### Goorma ayey soo Dhammaataa Soo-baarashada?

Shaqaalaha oo dhan waxaa shaqad-heliddooda qeyb ka ah baarista danbiyo hore iyo wax shaqo-xumo daryeel ah. Wakiilkaaga miisaaniyadda iyo shaqaaleynta ayaa kula sameyn doona baarista shaqaalaha afartii sanaba mar. Haddii wakiilkaaga miisaaniyadda iyo shaqaaleynta uu haysto sabab in mid ka mid ah shaqaalaha uu danbi galay mar dhow, waxaa qofkaas la soo marsiinayaa baaris cusub.

Shaqaalaha waxaa khasab ku ah in ay soo gudbiyaan marar badan caddeymaha laga rabo ee baarista afartii sanaba mar, ama mar kasta oo la weydiiyo. Haddii ay keeni waayaan waraaqaha caddeymaha ah, mar dambe kuuma shaqeyn karaan.

### Maxay tahay waxa uu Wakiilka Miisaaniyadda iyo Shaqaaleynta ka Eegayo Soo-baarashada Shaqaalaha Daryeelka?

Waaba qeyb baarista ka mid ah, in uu wakiilkaaga miisaaniyadda iyo shaqaaleynta macluumaad ka soo fiirsho xafiisyada kale ee Wisconsin, sida Waaxda Carruurta iyo Qoysaska iyo Waaxda Adeegga Amniga Dadweynaha. Taas waxaa ku jirta in la aqoonsado:

- Shaqaalaha daryeelka ee ku jira Diiwaanka Anshaxumada marka lagu soo caddeeyo anshaxumo shaqo, sida tacaddiyo ama dayacaad loo geystay ama in wax laga xaday guriga qofka loo adeegaayey.
- Qof loo diiday ama lagala noqday shatigii shaqada ee barnaamijyada dadka waaweyn ama kuwa carruurta.
- Eegista Natijjooyinka Baxnaaninta.
- Xaalad kasta oo ah tayo xirfadeed, shatiyo shaqo, ama shahaadooyin.

### Maxay yihiin Danbiyada uu Wakiilkeyga Miisaaniyadda iyo Shaqaaleynta ka Eegayo Soo-baarashada Danbiyo Hore?

Danbiyada noogu daran waxaa ka mid ah dad-dilid, gacan loo geystay dad kale, tacaddiyo galmo, tuugannimo, khiyaamo lacageed, danbiyo carruur loo geystay, ama isticmaalka maandooriyeyaasha. Lifaafa Cutubka 6.1B.1 ee Gacanqabsiga Habka Shaqada IRIS ([P-00708A](#)) ayaad ka heleysaa liiska danbiyada iyo dadka aadan shaqaaleyn karin oo dhan.

Qaar ka mid ah danbiyada qof lagu soo helay ayaa si joogto ah ugu diidaya in laga shaqeeyo barnaamijka IRIS. Danbiyadaas waxay ku qoran yihiin **far madow badan** ee ka eego lifaaqa. Taas macnaheedu waa in shaqaalaha lagu soo helay danbiyadaas mid ka mid ah, kuuma shaqeyn karaan shaqaalahaas oo wax racfaan ah ma qaadan karaan. Danbiyada aan ku qorneyn farta madowga badan racfaan ayaa laga qaadan karaa iyadoo la raacayo Habka Racfaanka Soo-baarashada Danbiyada. Si kastaba, haddii uu qof shaqaale ah magaciisu ku jiro danbiyada ku qoran lifaaqa dambe, qofkaas waxaa lagu soo helay danbi hore.

### **Maxaa Dhacaya haddii ay Shaqaale Baarista ka Gudbi Waayaan?**

Haddii shaqaalahaagu ka soo gudbi waayo soo-baaridda danbiyo hore balse aan qofkaas wax dambi ah lagu helin **farta madow** lifaaqa dhexdiisa, waxay racfaan u soo dirsan karaan Waaxda Adeegyada Caafimaadka. Haddii shaqaalahaaga lagu helo danbi far madow ku qoran lifaaqa dhexdiisa, wax rajo ah kama laha racfaan.

Si aad racfaan u dirsataan, adiga iyo shaqa-raadsadaha wa in aad buuxisaan foomka “Background Check Appeal Request – IRIS Program” ([F-01352](#)). La-taliyahaaga IRIS ayaa habka kuu sharxi kara.

### **Maxaa Dhacaya haddii Racfaanka la soo Diido?**

Haddii racfaanka la soo diido, ma jiro racfaan dambe oo idiin ku harsan Waaxda Adeegyada Caafimaadka. Laakiin waxaad caawimaad si kale ah ula soo xiriiri kartaa Waaxda Horumarinta Shaqaalaha

## 11.0 SHARCIYADA 40-KA SAAC EE CAAFIMAADKA IYO BADQABIDDA

Awood shaqa-bixiye ayaad leedahay markaad qof shaqaaleyneyso, jadwal u sameyneyso, tababareyso, iyo maamulidda shaqaalaha daryeelka. Shaqaalahaas waa kuwa aad adigu iskaa u qoraneyo. Cutubkaan marka uu shaqaale ka hadlayo, waxaan ka hadleynaa labada nooc ee shaqaalaha aad soo xulan karto inaad shaqaaleyso. Inaad shaqa-bixiye tahay waa masuuliyad muhiim ah, marka waxaa muhiim ah in la fahmo wakhtiga shaqada ee loo oggol yahay shaqaalahaaga.

### Waa maxay 40-ka Saac oo Sidee u Khuseeyaan Shaqaalahayga?

Toddobaad kasta saqda dhexe ee Axadda ayey shaqadu bilaabaneysaa oo waxay ku eg tahay saqda dhexe ee Sabtida 11:59. Sharciga 40-ka saac ma beddelaayo saacadaha daryeelka ee kuugu qoran qorshahaaha. Ujeeddadu waa in la yareeyo khatarta badqabiddaada iyo badqabidda shaqaalaha iyo in aad weli miisaaniyadda iyo shaqaalaha adigu xukunto.

Shaqaalaha qaarkood waxaa laga yaabaa in ay daryeelaan adiga iyo dad kale oo ku jira IRIS. Wax kasta oo ah adeegyo kala duwan oo shaqaaluhu kuu qabto, looma oggola in ay shaqeeyaan wax ka badan 40 saac toddobaadkiiba iyada oo aan oggolaansho laga helin xafiiska la-taliyahaaga IRIS. Shaqaalaha qaar ayaa qabta hawlo daryeel ah oo kala duwan, sida hawlaha guriga, tababarka xirfadda nolosha maalin kasta, hawlaha IRIS ee aad adigu ku hagto. Wax kasta oo ah adeegyo kala duwan oo uu qof shaqaale ah kuu qabto, looma oggola in ay shaqeeyaan wax ka badan 40 saac toddobaadkiiba iyada oo aan oggolaansho laga helin xafiiska la-taliyahaaga IRIS.

### Waa maxay Sharciyada Awoodda Shaqa-bixiye ee aan Raacayo?

- Sameyso qorshe adeeg iyo taageero shakhsi ahaaneed oo aan kuu oggolaaneyn in shaqaaluhu kuu shaqeeyaan 40 saac ka badan.
- Dejiso jadwal baahidaada ku saleysan oo shaqaaluhuna kugu filnaan doonaan, laakiin ha qoran shaqaale wax ka badan 40 saac.
- Ha sixiixin waraaqda saacadaha ama ha ka ballan qaadin shaqaalaha in lagu mushaari doono wax ka badan 40-saac toddobaadkiiba haddii aan oggolaansho laga soo helin xafiiska la-taliyahaaga IRIS. Tirada saacadaha loo oggol yahay shaqaalahaaga waxay ku qoran tahay qorshahaaga adeegga iyo taageerada.  
**Ogsoonow:** Haddii aad dhug u yeelan weydo oo intaadan saxiixin, habsan weydo saacadaha shaqadu inay sax yihiin, maamulxumo shaqa-bixiye ayaad sameysay. Haddii aad adiga ama shaqaalahaagu si xun u isticmaashaan, ama sameysaan maamul xumo miisaaniyadeed, waxaa laga yaabaa in lagaa saaro barnaamijka IRIS.
- Iska hubso shaqaalahaaga in mushaarka lagu siiyo inta lagula heshiiyey iyo wakhtiga loo oggolaaday. Markaad oggolaato waraaqda saacadaha, wakiilkaaga miisaaniyadda iyo shaqaaleynta ayaa mushaarka bixinaya. Haddii lacagta waraaqda saacadaha uu khalad ku jiro oo aad saxiixdo adigoo iska eegin, awooddaadii shaqa-bixiye ayaad si xun u maamushay. Waa inaad waraaqaha saacadaha dhug u yeelato ka hor intaadan saxiixin. Haddii aad adiga ama shaqaalahaagu si fiican u maamuli weydaan miisaaniyadda, waxaa laga yaabaa in lagaa saaro barnaamijka IRIS.
- Sameyso qorshe labaad oo imarjenso ah oo adag si aad u hubiso inaad haysato shaqaale ku caawiya haddii qof aad sugeysay ay dhacdo in uu imaan waayo.

- Iska hubso in shaqaalahaagu fahamsan yihiin sharciga 40-ka saac iyo masuuliyaddaada shaqa-bixiye ahaan.

## Maxaa Dhacaya haddii Qof Shaqaale ah uu ila Noolaado?

Haddii uu jiro qof shaqaale ah kula nool yahay, waxaa loo tixgelinayaa shaqaale kula nool. Shaqaalaha guriga kugula nool waxaa la siinayaa lacagta mushaarka ugu yar, laakiin **ma** heli karaan saacado shaqo oo dheeraad ah. Shaqaalaha guriga kugula nool waxay shaqeyn karaan ilaa 60 saac oo aan lacag dheeraad ah lahayn, laakiin waa in oggolaansho looga helo xafiiska la-taliyaha IRIS. Si kastaba, arrintan uma baahna booqasho ah ka-warhayn iyo xiriir ka socda xafiiska la-taliyaha IRIS. Waxaa jira wax ka reebban shaqaalaha kula nool marka loo eego Sharciga Heerarka Caddaaladda Shaqaalaha. Haddii aad rabto faahfaahin dheeraad ah, ka eego: [www.dol.gov/whd/regs/compliance/whdfs79b.htm](http://www.dol.gov/whd/regs/compliance/whdfs79b.htm) ama caawimaad aad ku fahamto weydiiso la-taliyahaaga IRIS.

## Ka Warran Daryeelka Shakhsiga ah ee aad Sameysato?

Ma soo gudbin kartid codsi gaar ah oo lagu beddelo saacadaha daryeelka shakhsiga ah ama qof cusub uma shaqaaleyn kartid si shaqo dheeraad ah laguugu qabto. Saacadahaas waxaa go'aamiya dhakhtarkaaga oo cidna kama beddeli karto barnaamijka IRIS. Laakiin, haddii uu jiro qof kaaga shaqeyna daryeelka shakhsiga ah ee aad sameysato **iyo** adeeg kale, waxaad soo codsan kartaa adeeg kale oo ka baxsan.

## Sidee baan Sharcigan ugu Codsanayaa Wax Gaar ah Mid Shaqaalaha ka mid ah si uu u Shaqeyo 40 saac ka badan Hal Toddobaad?

Si uu qof shaqaale kuu ah u shaqeyo 40 saac ka badan hal toddobaad, waa inaad si gaar ah u soo codsato qorshaha adigoo isticmaalaya foomka Participant-Hired Worker 40-Hour Health and Safety Assurance Exception Request form, kaasoo aad ka heleyso: <https://www.dhs.wisconsin.gov/forms/f01689.docx>. La-taliyahaaga IRIS ayaa kaala hadlaya sababta aad ugu baahan tahay wax gaar ah kuguna caawin doona foomka.

La-taliyahaaga IRIS ayaa oggolaanaya ama diidaya codsiga gaarka ah, kuuna sheegi doona go'aanka shan maamood oo ah kuwa shaqada foomka ka dib. Marka go'aan lagu hayo waxaa lagu weydiin doona:

- Waxa gaarka ah baahi miyaad u qabtaa?
- Badqabid iyo caafimaad miyaa kuugu jira saacado badan in lagu shaqeyo?
- Codisgaagu ma raacayaa sharciga 40-ka saac ee Xaqiijinta Badqabiddaada?

Haddii uu la-taliyahaaga IRIS codsiga kuu diido, ma heleysid ogeysiis sida caadiga ee go'aammada xafiisyada kale aad uga hesho. Ogeysiiska go'aanka waxaa lagu soo dirayaa marka hawl ama adeeg lagu diido, lagaa xaddido, lagaa yareeyo, ama lagaa joojiyo. Haddii codsigaaga lagu diido, raafaan ma qabsan kartid. Laakiin haddii uu la-taliyahaaga IRIS diido codsigaaga, waa in aad kala hadasho oo aad kala shaqeyso si kale oo aad taageeradaas ku heleyso. Hal xal oo diidmada ka dib ah waa inaad isku daydo inaad hesho qof kale oo shaqaale ah oo kuu shaqeyna saacadaha aad u baahan tahay.



## 12.0 TABABARIDDA SHAQAALAHA AAD ADIGU QORATO

Adiga ayaa noloshaada khabiir ku ah oo haddii aad doorato in aad shaqaaleyso shaqaale, waxaad u baahan tahay inaad tababar siiso sida ay kuu taageerayaan kuuguna adeegayaan. Sida fiican ee aad u siiso tababarka, waa sida ay kuugu sameyn karaan shaqo iyo daryeel tayadoodu sarreyso.

Markaad shaqaale qorato, waa inaad wax uga sheegto naftaada kuna tababarto hawlahaaga iyo adeegyadaada. Taas waxaa ku jirta in aad barto:

- Xaaladdaada, xanuunnadaada, iyo baahidaada maalin kasta.
- Qorshahaaga adeegga iyo taageeridda shakhsiga ah
- Jadwalkaaga maalin kasta iyo waxa la qabto.
- Xilka iyo waajibaadka shaqadooda, oo waxaa ku jira, oo qaarkood ka mid ah, hawlaha iyo adeegyada gurigaaga.
- Meelaha ay wax idiin yaallaan adiga iyo qoyska ama dadka aad la nooshahay.
- Sida badqabidda leh ee laguugu qaban karo daryeelka iyo hawlaha.
- Waxaad sameyneyso markay jiraan xaalado degdeg ah.
- Sida fiican ee laguugu shaqeyn karo oo laguugu ixtiraami karo dookhaaga.
- Marka gacmo-gelis loo isticmaalayo hawl, meesha laga helayo gacmo-geliska, iyo meesha lagu tuurayo gacmo-geliska ka dib marka la isticmaalo.
- Qorshahaaga xaaladaha degdegga ah haddii ay shaqaaluhu kuu imaan waayaan.

### Jawaabtaada Xaaladaha Degdegga ah

**Haddii aad khatar ku jirto ama aad isla markiiba caawimaad u baahan tahay, garaac 911.** Shaqaaluhu waa in ay garanayaan sida ay guriga kaaga saarayaan markay xaalad degdeg ah jirto. Shaqaaluhu sidoo kale waa in ay garnayaan meelaha ay la xiriirayaan iyo waxa ay sameynayaan marka aad guriga ka soo baxdo.

Haddii qof shaqaale ah shaqadaada ku dhaawacmo, si aad u soo sheegto isla markiiba la soo xiriir la-taliyahaaga IRIS iyo wakiilka miisaaniyadda iyo shaqaaleynta.



## 13.0 OGEYSIINTA JAWAABAHA IYO CODSIGA DACWAD-DHAGEYSIGA

Ogeysiinta wixii jawaabo ah waxay noqonayaan waraaq kaaga imaata xafiiska la-taliyahaaga IRIS haddii hawl ama adeeg lagu diido, lagaa xaddido, lagaa yareeyo, ama lagaa joojiyo. Waxaasina waa wax ama adeeg aad codsatay ama kuugu jirta qorshahaaga. Waraaqdu waxay kuu sheegeysaa sababta go'aanka iyo taariikhda uu is-beddelku bilaaban doono. Xafiiska la-taliyahaaga IRIS ayaa laga rabaa in ay go'aanka kuu soo diraan mar kasta oo lagu diido, lagaa xaddido, lagaa yareeyo, ama lagaa joojiyo mid ka mid ah hawlaha ama adeegyada.

### Maxaa Dhacaya haddii aan Helo Jawaab Ogeysiin ah?

Waxaad kala dooran kartaa waxyaabaha hoose:

- Inaad yeesho go'aanka ogeysiinta jawaabta ah ee laguugu diidayo, lagaaga xaddidayo, lagaaga yareynayo, ama lagaaga joojinayo codsi aad dirsatay ama wax ka mid ah qorshahaaga adeegga.
- Inaad kala shaqeyso xafiiska la-taliyahaaga IRIS in xal macquul ah lagu helo.
- Inaad dib u eegid madaxbannaan ka codsato barnaamijka IRIS. Waa in aad kala hadasho la-taliyahaaga IRIS haddii aad rabto codsi ah dib u eegid madaxbannaan.
- Inaad codsi dacwad-dhageysi ah u dirsato Qeybta Dacwad-dhageysiga iyo Racfaanka (Division of Hearings and Appeals) haddii aadan ku qanacsaneyn go'aanka jawaabta. Sida uu dhigayo barnaamijka IRIS iyo sharciga gobolka Wisconsin waxaad xaq u leedahay inaad jawaab kasta u codsato dacwad-dhageysi caddaalad ah. Tilmaamaha sida loo soo dirsado dacwad-dhageysi caddaalad ah waxaad ka heleysaa waraaqda jawaabta.

### Waa maxay Dacwad-dhageysida Caddaaladda ah ee Gobolka?

Dacwad-dhageysiga caddaaladda ah waxaad ka heleysaa fursad aad ku sharraxdo sababta uu u khaldan yahay go'aanka jawaabta ee waraaqda. Garsoore dacwooyinka madaniga ah oo ka socda Qeybta Dacwad-dhagesiga iyo Racfaanka ayaa ku dhageysan doona adiga iyo xafiiska la-taliyahaaga IRIS si loo go'aamiyo go'aanka in uu khaldanaa ama in uu saxsanaa. Marka xafiiska la-taliyahaaga IRIS uu go'aan kuu soo diro, waxaa lagu soo raacinayaa macluumaadka racfaan aad xaq u leedahay iyo foomka aad u baahan tahay in aad buuxiso oo u soo dirto dacwad-dhageysiga caddaaladda ah ee gobolka.

### Sidee u Dirsadaa Codsiga Dacwad-dhageysiga Caddaalada ah ee Gobolka?

Si aad u soo dirsato codsiga dacwad-dhagesiga, waxaad u baahan tahay foomka dacwadda oo ah Request for State Fair Hearing ama waraaq u soo qor qeybta dacwad-dhagesiga iyo racfaana (Division of Hearings and Appeals).

Waxaad foomka dacwadda ka heli kartaa xafiiska la-taliyahaaga IRIS ama internetka kala soo bax: <https://www.dhs.wisconsin.gov/forms/f0/f00236so.docx>. Markaad soo dirsato codsiga dacwad-dhageysiga, waxaad u baahan tahay inaad soo raaciso koobbiga warqadda jawaabta ogeysiinta ah si loo ogaado go'aanka aad diiddan tahay.

Haddii aad warqad soo dirto intii aad foom soo buuxin lahayd, waa inaad soo raaciso macluumaadka soo socda oo dhan:

- Koobbiga waraaqdii jawaabta ogeysiinta ahayd
- Maacaaga
- Cinwaankaaga



- Faahfaahin yar oo ah dhibka jira
- Magaca xafiiska la-taliyahaaga IRIS ee kuu soo diray waraaqda jawaabta ah
- Sagaalkaaga lambar
- Saxiixaaga.

Boostada ama fakis ahaan ayaad ku soo diri kartaa foomka ama warqadda, oo soo raaci waraaqda jawaabta ah, ku:

**Cinwaanka:**

IRIS Request for Fair Hearing  
Wisconsin Division of Hearings and Appeals  
PO Box 7875  
Madison, WI 53707-7875

AMA

**Fakis:**

608-264-9885

## **Waa Goorma Kama-dambeysta Codsiga Dacwad-dhageysiga Caddaaladda ah?**

Waraaqda jawaabta ah ayaa kuu sheegeysaa taariikhda iyo goorta uu dhici doono is-beddelka. Codsiga dacwad-dhageysiga caddaaladda ah waa in boosto la soo dhigo ama fakis lagu soo diro 45 maalmood ka dib taariikhda ku qoran jawaabtii aad ka heshay xafiiska la-taliyahaaga IRIS. Marka aad soo dirto codsiga dacwad-dhageysiga, Waaxda Dacwad-dhageysiga iyo Racfaanka ayaa kuu soo sheegeysa taariikhda iyo wakhtiga lagu qabtay.

## **Ma sii Wadan karaa Adeegyadeyda ilaa iyo wakhtiga Dacwad-dhagesiyga Caddaaladda ah?**

Waxaad codsan kartaa in hawlaha iyo adeegyada lagu sii wado ilaa aad go'aan ka hesho dacwad-dhagesigaaga. Haddii aad dooneyso adeegyada in lagu sii wado, waa in aad boostada soo dhigto codsigaaga dacwad-dhagesysiga **maalinta kama-dambeysta ah ama ka hor taariikhda ku qoran waraaqda jawaabta**. Waxaa in aad codsigaaga ku soo qorto in aad rabto in lagu sii wado adeegyadaada. Haddii ay Qeybta Dacwad-dhageysiga iyo Racfaanka kaa hesho codsigaaga maalinta kama-dambeysa ah ama ka hor taariikhda ku qoran waraaqda jawaabta, adeegyada waa lagu sii wadayaa ilaa go'aan la soo saaro.

Haddii ay Qeybta Dacwad-dhageysiga iyo Racfaanka kaa hesho codsigaaga *ka dib* maalinta kama-dambeysa ah taariikhda ku qoran waraaqda jawaabta, adeegyada waa lagu sii wadayaa ilaa go'aan ka soo baxayo. La-taliyahaaga IRIS ayaa kugu soo wargelin doona qorshaha wixii laga beddelo.

Waxaa laga yaabaa in aadan ku farxin go'aanka dacwad-dhageysiga. Haddii Qeybta Dacwad-dhageysiga iyo Racfaanka ay kaa soo hor jeesato, waxaa la yaabaa in aad bixiso lacagtii adeegyada aysan ahayn in lagu qabto.

## **Waa maxay Wada-eegista Labada-dhinac?**

Haddii aad codsi soo dirsato dacwad-dhageysi ah, dad la yiraahdo Metastar ayaa ugu horreyn idin la shaqeynaya, adiga, xafiiska la-taliyahaaga IRIS, iyo Waaxda Adeegyada Caafimaadka si xal wada-eegis ah loo helo. Taasi waa foom ka gaar ah kan habka dacwad-dhageysiga. Metastar ayaa sameyneysa dibu-eegista gebi ahaan dacwad-dhageysiga IRIS. Metastar waa dhexdhexaadiyeyaal madaxbannaan oo ma go'aaminayaan racfaankaaga. Hase yeeshee, Metastar waxay kugu caawinayaan famidda xuquuqdaada iyo helidda xal idiin fiican adiga iyo xafiiska la-taliyahaaga. Habka wada-eegista labada dhinac wuxuu qaataa ilaa 20 maalmood oo ah kuwa shaqada.



## **Maxaa dhacaya Haddii aan Is-beddelo oo aanan rabin Dacwad-dhageysiga?**

Waad la noqon kartaa codsigaaga dacwad-dhageysiga markii aad rabto iyo sabab kasta. Haddii aad la noqoto codsigaaga, waa in aad xafiiska dacwadaha ama Division of Hearings and Appeals u soo dirto foomka ka noqoshada ama Voluntary Withdrawal form (DHA-17). Koobbiga foomka waxaad ka heleysaa xafiiska la-taliyahaaga IRIS, Metastar, ama internetka:

<https://doa.wi.gov/DHA/WFSVW.pdf>.

## **Sidee baa loo Sameeyaa Habka Dacwad-dhageysiga Caddaaladda ah?**

Dacwad-dhageysiga waxaa lagu sameeyaa taleefanka ama fool-ka-fool. Waxaad la kulmeysaa garsooraha dacwadaha madaniga ah. Qof baa kugu metali kara dacwad-dhageysigan, sida qareen, saaxiib, qof ka mid ah qoyskaaga, ama markhaati. Waxaad soo bandhigi kartaa caddeyn ka hor ama marka lagu dhageysanaayo. Xafiiska la-taliyahaaga IRIS, wakiilka miisaaniyadda iyo shaqaaleynta, iyo Waaxda Adeegyada Caafimaadka ayaa kugu caawin kara qoraalladaadii hore, laakiin waa in aad ka codsato.

Xafiiska la-taliyahaaga IRIS ayaa ka qeyb qaadanaya dacwadda oo waxay garsooraha u sharxi doonaan waraaqda jawaabta ah ee aad racfaanka ka qaadatay. Xafiiska la-taliyahaaga IRIS ayaa difaacaya sharciyada barnaamjka IRIS ee ka dambeeya go'aanka jawaabta ah. Sababtaas awgeed, adigu waxaad masuul ka tahay fikraddaada oo ah in xafiiska la-taliyahaaga IRIS uu ku khaldan yahay go'aankooda. Garsooraha ayaa sharxi doona sharciyada dacwad-dhageysi ka dibna dhageysanaya caddeymaha labada dhinac, laakiin isla maalintaas go'aan lagama gaaro. Garsooraha ayaa boostada ku soo diri doona go'aanka kama dambeysta ah oo qoran.

## **Maxaa dhacaya haddii aan ku Qanci waayo Go'aanka?**

Haddii aad ku qanci weydo go'aanka, waxaad xaq u leedahay inaad codsato dacwad ah dhageysi labaad:

- Markaad haysato caddeyn cusub oo go'aanka beddeli karta
- Markaad daremeyso inuu khalad ku jiro xaqiiqooyinka go'aanka
- Markaad daremeyso in uu khalad ku jiro sharciyada go'aanka

Caddeyn qoran oo ah dacwad-dhageysi labaad ayaad ku heleysaa 20 maalmood ka dib go'aanka qoran. Go'aanka qoran waxaad ka heleysaa macluumaadka sida aad ku codsan karto dacwad-dhageysi labaad.

Sidoo kale maxkamadda racfaanka ah ee wareegta ee degmadaada ayaad u dirsan kartaa racfaankaaga. Go'aanka qoran ee dacwad-dhageysiga waxaa la socda macluumaadka maxkamadda racfaanka ah ee wareegta. Si kasta, xaq uma lihid in ay adeegyadu kuu socdaan inta ay kuu socoto maxkamadda racfaanka ah ee wareegta.

## **Yaa Qareen ii noqonaya ama igu Caawinaya Wixii aan Xaq u Leeyahay?**

Haddii aad dooneyso inaad ogaato xuquuqdaada ama habka dacwad-dhageysiga gobolka ama inaad soo dirsato dibu-eegid laba dhinac ah, waxaad Metastar kala soo xiriirtaa: **1-888-203-8338**.

Haddii aad dooneyso in aad caawimaad qareennimo ka hesho wakiilka dadweynaha, waxaad la soo xiriirtaa Ururka Xuquuqda Naafada Wisconsin (da'da 18 ilaa 59) ama Guddiga Wayeelka (da'da 60 iyo ka sii weyn).

### **Ururka Xuquuqda Naafada Wisconsin**

#### **Madison Office**

1502 West Broadway, St 201  
Madison, WI 53713  
608-267-0214  
800-928-8778 lacag la'aan  
608-267-0368 fakis  
888-758-6049 TTY

#### **Milwaukee Office**

6737 W. Washington St,  
Ste. 3230  
Milwaukee, WI 53214  
414-773-4646  
800-708-3034 lacag la'aan  
414-773-4647 fakis  
888-758-6049 TTY

#### **Rice Lake Office**

217 W. Knapp Street  
Rice Lake, WI 54868  
715-736-1232  
877-338-3724 lacag la'aan  
715-736-1252 fakis  
888-758-6049 TTY

### **Board on Aging**

Lambarka Taleefankooda: 1-800-815-0015



## 14.0 CABASHOYINKA LABADA NOOC

Xafiiska la-taliyahaaga IRIS iyo wakiilka miisaaniyadda iyo shaqaaleynta ayaa kugu caawin doona. Haddii aadan ku faraxsaneyn la-taliyahaaga IRIS, xafiiska la-taliyahaaga IRIS, ama wakiilka miisaaniyadda iyo shaqaaleynta, balse waa in ay ogaadaan khaladka jira. Waxaad xaq u leedahay inaad soo dirsato mid ka mid ah labada nooc ee cabashada, iyo in aad soo sheegto fikraddaada ku saabsan wax kasta oo aad ka qabto IRIS.

### Maxay ku Kala Duwan Yihiin Labada Nooc ee Cabashooyinka ah?

Nooc **xal-raadin** ayaa la yiraahdaa oo waa marka aad ku qanci weydo go'aan balse aad xal toos ah ka rabto meelaha aad is-haysaan, sida xafiiska la-taliyahaaga IRIS, la-taliyahaaga IRIS, ama wakiilka miisaaniyadda iyo shaqaaleynta.

Nooc **cabasho** gudbin ah ayaa la yiraahdaa oo waa mid rasmi ah oo noqon karta qoraal ama afka. Nooca cabashada gudbinta ah waa caddeyn rasmi ah oo ku saabsan xafiiska la-taliyahaaga IRIS, la-taliyahaaga IRIS, ama wakiilka miisaaniyadda iyo shaqaaleynta. Soo diridda cabashada qoran waxay u baahan tahay buuxinta waraaqo muujiya arrinta dhacday.

### Cabashooyinku ma Leeyihiin Wakhti Kama-dambeys ah?

Maya, markii aad rabto ayaad soo gudbin kartaa cabasho xal-raadin ah ama mid qoraal ah. Laakiin wa inaad sugin marka aad rabto inaad cabasho soo gudbiso.

### Maxaa Dhacaya Ka dib Marka aan soo Dirsado Cabasho?

Qof kasta oo uu ahaado, meesha aad ka soo dirsato cabasho, qof, xafiis, shaqaale, ama waax dowladeed, waxa laga shaqeyn doonaa si xal loogu helo walaacaaga. Yoolku waa in la wada shaqeeyo oo la isku dayo in dhibka jira loo helo xal la wada aqbali karo. Cabshada nooc kasta waa in xal loogu helo 30 cisho gudahood, balse dhibka lacagta shaqaalaha waa in lagu xalliyo marka lacagta la qaadanayo ilaa laba toddobaad.

### Waa maxay Dhexdhexaadiyuhu?

Dhexdhexaadiye madaxbannaan waa qof ama xafiis la shaqeeya dadka aan qanacsaneyn ee raadinaya xal dhinac kasta u fiican. Dhexdhexaadiyaha IRIS waxaa la yiraahdaa MetaStar.

### Waa maxay Wakiilka Dadweynaha?

Wakiilka dadweynaha waa qareenka dadka IRIS ku jira. Waxa ay baaraan labada nooc ee cabashooyinka si ay isugu dayaan in ay xal helaan. Laba wakiil oo dadweyne ayaa u shaqeeya IRIS, balse da'da qofka ayey ku xiran tahay. Wakiillada dadweynaha ee IRIS waa Ururka Xuquuqda Naafada Wisconsin (da'da 18 ilaa 59) iyo Guddiga Waayeelka (da'da 60 iyo ka sii weyn).

### Sidee baan u Soo Dirsan Karaa Cabshooyinkega?

Cabashooyinka waxay noqon karaan afka, in aad timaaddo, ama soo qorato, sida warqad ama farriin. Waaxda Adeegyada Caafimaadka waxay kugu dhiirri gelineysaa si aad xal u hesho cabashada ka hor inaad la hadasho xafiiska la-taliyahaaga IRIS, la-taliyahaaga IRIS, xafiiska shaqaalaha daryeelka ee is-hagiddaada, wakiilka miisaaniyadda iyo shaqaaleynta, ama shaqaalaha marka aad ku qanci weydo ama aadan ku faraxsaneyn go'aan. Inaad si toos ah



dadkaas ula shaqeyso ayaa ah sida ugu dhakhso badan uguna fudud ee aad xal ku heli karto. Waxaad cabashadaada la soo dirsan kartaa la-taliyahaaga IRIS, xafiiska la-taliyahaaga IRIS, wakiilka miisaaniyadda iyo shaqaaleynta, ama Waaxda Adeegyada Caafimaadka.

Haddii aadan rabin ama aad xal u weydo cabashadaada, waxaad bilaabi kartaa inaad soo dirsato nooca rasmiga ah ee qoran si ay kuu caawiyaan wakiilka IRIS ama dhexdhexaadiyaha.

Waxaad cabashadaada u soo dirsan kartaa siyaabaha hoos ku qoran:

- Inaad taleefan u soo dirto Metastar: **1-888-203-8338**.
- Inaad la soo xiriirto Ururka Xuquuqda Naafada Wisconsin, haddii da'daada tahay 18 ilaa 59.
- Inaad la soo xiriirto Guddiga Waayeelka, haddii da'daada tahay 60 ama ka sii weyn.
- Soo-buuxinta iyo soo-gudbinta foomka cabashada IRIS ([www.dhs.wisconsin.gov/forms/f0/f01212.docx](http://www.dhs.wisconsin.gov/forms/f0/f01212.docx)). Waxaad foomka cabashadaada ka heli kartaa internetka ama weydiiso la-taliyahaaga IRIS, xafiiska la-taliyahaaga IRIS, wakiilkaaga miisaaniyadda iyo shaqaaleynta, ama Waaxda Adeegyada Caafimaadka. Haddii uu qof kugu caawiyo buuxinta foomka cabashada, iska hubi inaad iska eegto intaadan soo gudbin.

## Sidee baan Ula Xiriiri karaa Dadka Aniga i Caawin kara?

Haddii aad rabto inaad la xiriirto la-taliyahaaga IRIS, xafiiska la-taliyahaaga IRIS, ama wakiilka miisaaniyadda iyo shaqaaleynta balse aadan aqoon lambarrada taleefannadooda, la soo xiriir IRIS Call Center si aad macluumaadkaas uga hesho. Taleefankooduna waa: **1-888-515-4747**.

Haddii aad dooneyso inaad la xiriirto dhexdhexaadiyaha ama aad soo dirsato cabasho, MetaStar kala soo xiriir taleefankooda: **888-203-8338**.

Haddii aad dooneyso in aad la xiriirto wakiilka dadweynaha, waxaad la soo xiriirtaa Ururka Xuquuqda Naafada Wisconsin (da'da 18 ilaa 59) ama Guddiga Wayeelka (da'da 60 iyo ka sii weyn).

### Disability Rights Wisconsin

#### Madison Office

1502 West Broadway, St 201  
Madison, WI 53713  
608-267-0214  
800-928-8778 lacag la'aan  
833-635-1968 fakis  
888-758-6049 TTY

#### Milwaukee Office

6737 W. Washington St, Ste. 3230  
Milwaukee, WI 53214  
414-773-4646  
800-708-3034 lacag la'aan  
833-635-1968 fakis  
888-758-6049 TTY

#### Rice Lake Office

217 W. Knapp Street  
Rice Lake, WI 54868  
715-736-1232  
877-338-3724 lacag la'aan  
833-635-1968 fakis  
888-758-6049 TTY

### Board on Aging

Lambarka Taleefankooda: 1-800-815-0015



## 15.0 XUQUUQDAADA KAARKA MEDICAID

**WAXAAD XAQ U LEEDAHAY OGEYSIIN QORAN** oo kaaga timaadda Waaxda Adeegyada Caafimaadka ka hor intaysan jawaab soo bixin si aad u joojiso ama isaga yareeyso manaafacaadka daryeelka caafimaadka ee (Medicaid, BadgerCare Plus, Family Planning Only Services). Go'aammada badankooda waraaq ayaad ka heleysaa ugu yaraan 10 maalmood ka hor inta aan lagu dhaqmin. Warqadda waxay kuu soo diraya xafiiska diiwaanka dakhliyada dadweynaha ee deegaankaaga. Haddii aadan xaq u lahayn kaarka Medicaid, kuma jiri kartid barnaamijka IRIS.

**WAXAAD CODSAN KARTAA DACWAD-DHAGEYSI CADDAAALAD AH** haddii aad ku qanci weydo jawaab kasta oo kaaga timaadda xafiiska. Waxaad codsan kartaa dacwad-dhageysi caddaalad ah oo qoran oo kaaga timaadda Waaxda Maamulka, Qeybta Dacwad-dhageysiga iyo Racfaanka, PO Box 7875, Madison, WI 53707-7875 ama soo garaac 608-266-7709. Codsigaaga waa in lagu helo 45 maalmood laga soo bilaabo taariikhda jawaabta. Wakhtiga ay wax bilaabanayaan mar kasta waraaqda ayey kuugu qoran yahay.

Sida badan, haddii codsiga dacwad-dhageysiga ay hesho Waaxda Dacwad-dhageysiga iyo Racfaan ka hor intaan ficilkii jawaabta kuu bilaaban, kaama istaageeyso ama lagaama yareynayo manaafacaadkaaga. Manaafacaadkaaga waad heleysaa illaa go'aan laga soo gaaro racfaankaaga. Wakhtigaas inta lagu guda-jiro, haddii uu is-beddel kale dhaco, waraaq kale ayaad heleysaa. Haddii aad ku qanci weydo go'aanka dacwad-dhageysiga, racfaac ayaad qaadan kartaa oo waxaad codsan kartaa dacwad-dhageysi labaad. Haddii go'aanka dacwad-dhageysiga uu manaafacaadka kaa joojiyo ama kaa yareeyo, inaad soo celiso lacagta kugu baxday intii racfaanku socday ayaa laga yaabaa. Waxaad codsan kartaa in manaafacaadka lagaa joojiyo.

**ADIGA AYAA NAFTAADA METALI KARA AMA QOF AYAA KU METALI KARA** dacwad-dhageysigaaga ama waxaa ku metalaya qareen taleefanka ah, saaxiib, ama qof kale. Xafiiska la-taliyahaaga IRIS iyo Waaxda Adeegyada Caafimaadka ma bixin doonaan lacagta qareenka mana ku metali karaan. Laakiin wakiilka dadweynaha ayaad ka heli kartaa adeeg xagga sharciga ah oo lacag la'aan ah haddii aad xaq ugu yeelato.

Haddii aad imaan weydo dacwad-dhageysigaaga ama wakiil kuu imaan waayo iyadoo aydnaan haysan cudurdaar run ah, racfaankaaga waa laga tagayaa, oo waaba la diidi doonaa.

**BAARIS KAMBUYUUTAR AH:** Haddii aad shaqeyso, mushaarka aad soo sheegto kambuyuutar ayaa u eegaya mushaarka uu xafiiska shaqaaleynta u gudbiyo Waaxda Arrimaha Shaqaalaha. Hay'adda canshuuraha, Maamulka Ceymiska Dowladda Dhexe, Qeybta Ceymiska Shaqaalaha, iyo Waaxda Gaadiidka ayaa lagala xiriiri doonaa wixii dakhli ama hanti ah oo aad haysato.

**KAARKA FORWARDHEALTH:** Mar kasta oo aad aaddo BadgerCare Plus ama goobaha qaata Medicaid, waxay ku weydiinayaan kaarkaaga ForwardHealth. Adeegyada qaarkood waxaa laga yaabaa in aad xoogaa lacag ah bixiso. Lacagtaad bixineyso waxay ku xiran tahay nooca iyo lacagta adeegga. Goobta caafimaadka ayaa kuu sheegeysa lacagta lagaa rabo ama haddii uusan qorshahaaga daryeelka caafimaadka kaa bixineyn adeeggooda. Haddii aad wax su'aalo ah ka qabto qorshahaaga daryeelka caafimaadka, kala soo xiriir adeegyada dadweynaha 1-800-362-3002.





**HADDII AAD HESHO MANAAFACAAD AMA ADEEG**, waa inaad raacdo sharciyada hoose

- **MARNA** macluumaad been ah ha sheegan ama ha qarin macluumaad si aad u hesho ama u sii wadato manaafacaadka.
- **MARNA** wax kale ha ku beddelan ama ha sii iibin kaarka ForwardHealth.
- **MARNA** ha beddelin kaararkaaga si aad ugu hesho manaafacaad aadan xaq u lahayn.
- **MARNA** ha isticmaalin kaar ForwardHealth ah oo uu qof kale leeyahay.

### **MIDABTAKOORID**

Waaxda Adeegyada Caafimaadka waa goob laga helo shaqooyin iyo adeegyo loo siman yahay. Dhammaan dadka soo codsada ama waaxdan ka hela manaafacaad waxaa laga ilaalinayaa midabtakoorig ku saleysan qowmiyad, midab, asalkii hore, xaalad naafinnimo, jinsi, lammaanaha qof doorbido, da', ama diin. Sharciyada gobolka iyo federaalka waxaa shuruud u ah in dhammaan manaafacaadka daryeelka caafimaadka ee BadgerCare Plus ay ku saleysnaadaan midabtakoorig la'aan.

Wixii su'aalo xuquuqda madaniga ah, soo garaac 1 608-266-9372 (cod) ama 888-701-1251 (TTY).

Si aad u soo dirsato cabasho ku saabsan midabtakoorig, la soo xiriir mid ka mid ah:

Wisconsin Department of Health Services  
Affirmative Action/Civil Rights Compliance Office  
1 W. Wilson St., Rm. 555  
Madison, WI 53707-7850

Teleefanka: 608-266-9372 (cod)  
888-701-1251 (TTY)  
608-267-2147 (fakis)

AMA

US Department of Health and Human Services  
Office for Civil Rights – Region V  
233 N. Michigan Avenue, Suite 240  
Chicago, IL 60601

Taleefanka: 312-886-5077 (cod) ama  
312-353-5693 (TTY)





**MACLUUMAADKA GACANQABSIGA AKHRISTAHA IRIS: QEYBTA AQBALAADDA**

**TILMAAMAHA:** Foomkan waxaa loo isticmaalayaa aqbalaadda macluumaadka iyo helidda barnaamijka dadweynaha ee IRIS. Buuxinta foomkan ma aha shuruud ku qoran Sharciiga Gobolka Wisconsin; hase yeeshee buuxinta foomkan waa shuruud la isaga rabo barnaamijka IRIS. Qofka kasta iyo la-taliyahaaga IRIS waa in ay buuxiyaan ka dib markay buuxiyaan dibu-eegista iyo falanqeynta Waraaqaha Gacanqabsiga Akhristaha ee IRIS ([P-01704](#)). Macluumaadka shakhsiga ah ee la isku aqoonsan karo ee foomkan waxa loo ururinayo waa in lagu xaqiijiyo inay dibu-eegistu dhan tahay, iyo in ujeedo keliya loo isticmaalayo.

**QEYBTA I – WARBIXIN SHAKHSI AHAANEED**

Magaca Qofka (Awoowahaa, Magacaaga)	Lambarkaaga MCI
Magaca la-taliyahaaga IRIS	Magaca Xafiiska la-taliyahaaga IRIS
Magaca Masuulka iyo/ama Dadka ku Metalaya (Haddii uu jiraan)	

Anigoo ah (Codsadaha) waxaan haystaa:  Qof Masuul ah  Qof igu Metala Daryeelka Caafimaadka  Midkoodna ma Haysto

Anigoo ah (Codsadaha) waxaan Waraaqaha Gacanqabsiga Akhristaha ka eegay:

Wacyigelinta Bilowga ah  Booqashada Sannadka  Xallinta Qoran oon Eegay  Maamulxumada/Iska Samee

**QEYBTA II – QEYBTA AQBALAADDA**

Xarfaha magacayga ee qoran waa aqbalaadda inaan helay oo aan eegay qeybaha soo socda ee Waraaqaha Gacanqabsiga Akhristaha ([P-01704](#)) la-taliyahayga IRIS ayaana ila joogay:

<b>3.0 Masuuliyadka Is-hagidda</b> Taariikhdaad wada eegteen	Xarfaha Magacaaga – Adiga ama Masuulkaaga	<b>4.0 La-socoshada Miisaaniyadda iyo SAMEYNTA QORSHAHA</b> Taariikhdaad wada eegteen	Xarfaha Magacaaga – Adiga ama Masuulkaaga
<b>5.0 Ka-hortagidda Maamulxumada iyo Khiyaamada Lacagta</b> Taariikhdaad wada eegteen	Xarfaha Magacaaga – Adiga ama Masuulkaaga	<b>6.0 Maslaxadaha Labada Dhinac</b> Taariikhdaad wada eegteen	Xarfaha Magacaaga – Adiga ama Masuulkaaga
<b>7.0 Soo-sheegidda Wixii Halis ah</b> Taariikhdaad wada eegteen	Xarfaha Magacaaga – Adiga ama Masuulkaaga	<b>8.0 Habka Xakameynta</b> Taariikhdaad wada eegteen	Xarfaha Magacaaga – Adiga ama Masuulkaaga
<b>9.0 Macluumaadka Daryeelka Caafimaadka Sannad Kasta</b> Taariikhdaad wada eegteen	Xarfaha Magacaaga – Adiga ama Masuulkaaga	<b>10.0 Soo-baarashada Danbiyo Hore</b> Taariikhdaad wada eegteen	Xarfaha Magacaaga – Adiga ama Masuulkaaga
<b>11.0 Sharciyada 40-ka Saac ee Caafimaadka iyo Badqabidda</b> Taariikhdaad wada eegteen	Xarfaha Magacaaga – Adiga ama Masuulkaaga	<b>12.0 Tababaridda Shaqaalaha aad Adigu Qorato</b> Taariikhdaad wada eegteen	Xarfaha Magacaaga – Adiga ama Masuulkaaga
<b>13.0 Ogeysiinta Jawaabaha iyo Codsiga Dacwad-dhageysiga</b> Taariikhdaad wada eegteen	Xarfaha Magacaaga – Adiga ama Masuulkaaga	<b>14.0 Cabshooyinka Labada Nooc</b> Taariikhdaad wada eegteen	Xarfaha Magacaaga – Adiga ama Masuulkaaga

**Oraahda Aqbalaadda ah:**

1. Waxaan fursad u helay inaan wixii su'aalo ah weydiyo la-taliyahayga IRIS.
2. Waan haysanayaa oo waxaan u tixraacayaa Waraaqaha Gacanqabsiga Akhristaha ee IRIS ([P-01704](#)) wixii faahfaahin dheeraad ah.
3. Waxaan fahamsanahay in anigoo ah qof ku jira IRIS haddii su'aalo ka qabo mustaqbalka waajibadkeyga, waxaan kala hadli karaa la-taliyahayga IRIS.

<b>SAXIIXA – Adiga</b>	Taariikhda Saxiixa
<b>SAXIIXA – Masuulka ama Go'aan-sameeye Sharciyeysan (Haddii uu jiro)</b>	Taariikhda Saxiixa

**(La-taliyahaaga IRIS)** Saxiixayga hoose waa caddeynta in aan shakhsi ahaan qofka saxiixay la eegay waraaqahan iyo/ama masuul u qoran oo waxaan siiyey fursad wixii su'aalo ah oo aan uga jawaabay.

<b>SAXIIXA – La-taliyaha IRIS</b>	Taariikhda Saxiixa
-----------------------------------	--------------------

**QEYBTA HOOSE BUUXI KELIYA HADDII UU CODSADUHU BUUXINAYO DIBU-EEGISTA SANNADKA**

Saxiixayga hoose waa caddeynta inaan tababaray dhammaan shaqaalaha aan u qortay baahideyda awgeed, laakiin kuma eka: hawlaha taageerada guriga, adeegyada shaqaalaha nasashada, gaadiidka, xirfadaha nolasha maalin kasta, taageero shaqo iyo/ama baahida adeegga ah ee habdhaqanka.

<b>SAXIIXA – Adiga</b>	Taariikhda Saxiixa
------------------------	--------------------

# TILMAAMAHA LA RAACAYO

**OGEYSIIS MUHIIM AH: Foomkan waa in meel kasta la buuxiyo. Foomka aan la wada buuxin dibudhac ayaa ku imaanaya.**

## Yaa Isticmaalaya Foomkan

Foomkan waxaa uu khasab ku yahay in ay isticmaalaan xafiisyada la-taliyaha IRIS ee u adeega dadka ku jira barnaamijka IRIS. Haddii ay xalraadin muhiim tahay, mar ay noqotaba, foomkan waa in uu isticmaalo la-taliyahaaga IRIS si dadka iyo/ama wakiilladooda looga baro in ay dooran karaan qeybo/macluumaad. Haddii macluumaad labaad ay muhiim tahay, foom cusub waa in la buuxiyo si loo aqbal qeybaha la isla eegay marka dibu-eegista la sameeyey.

## Sida Foomkan loo Buuxiyo

Foomkan kambuyuutar ahaan waa in lagu buuxiyo laguna soo diro. Waraaqdan waxaa lagu buuxin karaa barnaamijka Microsoft Word document, laakiin waa in uu gacan ku saxiixo codsadhaha iyo ama wakiil sharciyeysan, iyo la-taliyaha IRIS. TAB taabo ama GUJI meelaha aad buuxineyso.

## QEYBTA I – WARBIXIN SHAKHSI AHAANEEDAANEED

**Magacaaga:** Ku qor magacaaga.

**Lambarkaaga MCI:** Ku qor lambarkaaga MCI.

**Magaca la-taliyahaaga IRIS:** Ku qor magaca la-taliyahaaga IRIS.

**Magaca Xafiiska la-taliyahaaga IRIS:** Ku qor magaca xafiiska la-taliyahaaga.

**Magaca Masuulka (Masuulka iyo/ama Warqad Metalaad ah oo Sharciyeysan (Haddii uu jiro):** Qor magaca qof ah masuul ama wakiil sharciyeysan.

**Noo sheeg haddii aad haysato qof kugu caawinaya is-hagiddaada:** Haddii masuul hadda ah uu jiro, haddii loo diiwaan geliyey Metalaad Sharciyeysan oo ah Daryeelka Caafimaadka, ama haddii uusan midna jirin.

**Noo sheeg sababta dib loogu eegayo Waraaqaha Gacanqabsiga Akhristaha:** haddii ay tahay wacyigelinta hore, Booqashada sannadkii, ama haddii ay tahay Hagaajinta Waxyaabaha Qoran.

## QEYBTA II – QEYBTA AQBALAADDA

**Gacanqabsiga Qeyb Kasta:** Qeyb kasta lambar ayey leedahay ku dul qoran meelaha aad saxiixaysaan adiga iyo masuulka iyadoo aad taariikhda ku muujineysaan qeyb kasta oo aad wada eegtaan la-taliyaha IRIS.

### Taariikhdaad wada eegteen

Adiga ama masuulkaaga waa in ay taariikhda ku qortaan qeyb kasta oo aad wada eegtaan la-taliyaha IRIS. Qeyb kasta waa in la taariikheeyo markaad wada eegtaan.

### Xarfaha Magacaaga – Adiga ama Masuulkaaga

Adiga ama masuulkaaga waa inaad ku qortaan xarfaha magacyadiinna cutub kasta markaad dhammeysaan wada-eegista si aad u caddeysaan in aad wada eegteen la-taliyaha IRIS oo taariikhdana ku qora dhinaca bidixe.

## SAXIIXA – Adiga

Adigu waa inaad saxiixdo foomka ka dib markaad la-taliyaha IRIS wada eegtaan **GEBI AHAANBA** qeyb kasta. Haddii aad fahamsiin u baahato, adigu waa in aad saxiixdo qeybaha laguugu cesho ka dib marka dib lagu baro oo aad qeyb kasta la-taliyaha IRIS wada eegtaan.

## SAXIIXA – Masuulka ama Go'aan-sameeye Sharciyeysan (Haddii uu jiro)

Masuulka/Qofka ku Metalaya waa in uu saxiixdo foomka ka dib marka la-taliyaha IRIS lala eego gebi ahaan qeybaha. Haddii aad fahamsiin u baahato, adigu waa in uu Masuulku/Qofka ku Metalaya saxiixdo qeybaha laguugu cesho ka dib marka dib lagu baro oo aad qeyb kasta La-taliyaha IRIS wada eegtaan.

## SAXIIXA – La-taliyaha IRIS

La-taliyaha waa in uu saxiixdo foomka ka dib marka uu xaqiijiyo adiga iyo/ama masuulka ama qofka ku metalaya in aydnaan wax su'aalo ah ka qabtaan gacanqabsiga.

## Qofka Foomkan Buuxinaya

Markaad soo gudbineyso foomkan, waxaad xaqiijineysaa in macluumaadka lagaa helo la soo xaqiijiyo in ay sax yihiin ogaantaa inta aad ka war hayso.

## Sida Foomkan loo Soo Gudbiyo

Markaad dhammeyso, foomkan internetka soo geli Feylkaaga shakhsiga ah ee ku jira WISITS.





## **Wixii faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan IRIS:**

Wisconsin Department of Health Services Barta Internetka ee IRIS:

<https://www.dhs.wisconsin.gov/iris/index.htm>